# Qisadii Raymaa



Abdulk

## *WAREYSIGII: GABADHII JINNIGA AHEYD EE REYMAA, QEYBTII 1-AAD*

*Qalinka **Abukar Albadri** Waxaa Dib U Habeeyey **Abdulkadir Uukow***

*– Waxaan dhowaan idin sheegay in aan idin soo bandhigi doono wareysi dheer oo aan la yeelan doono gabar jinni ah oo magaceeda la yiraahdo Reymaa, taas oo ka tirsan degganayaasha Magaalada Muqdisho ee jinniga ah, gaar ahaan kuwa xaafadda Liido ee degmada Cabdulcasiis.*

*Wareysigan oo aan kaga hadalnay guud ahaan nolosha jinniga, gaar*

Copyright telegram @akhriskaab



AKHRISKAAB FREE BOOKS

*ahaanna Reymaa nolosheeda, qabiilkeeda, Jaceylkeeda, xiriirka jinniga iyo insiga ka dhexeeya, halisaha ay la kulmaan xilliyada qaraxyada iyo nolosha hoose ee dhanka raaxada jinka ayaa waxaan aan idinkugu soo gudbin doonaa si taxane ah.*
*Wareysiga wuxuu u dhacay qaab su'aal iyo jawaab ah, waxaana halkan idinkugu soo gudbinayaa qeybtiisa 1-aad, si aad uga bogataan, isla markaasna u fahamtaan nolosha jinka Soomaaliyeed, meelaha ay nolol ahaan ka siman yihiin jinka Soomaaliyeed iyo dadka Soomaaliyeed iyo farqiyada u dhexeeya labada qowmiyadood.*

*Su'aal: Reymaa marka hore ku soo dhowow geedka hoostiisa, marka xigtana waxaan kaaga mahad celinayaa in aad fursad ii siisay in aan ku arko aniga oo aan kaa cabsaneyn, iyo in aad ii ogolaatay in aan kula yeesho wareysi isla markaasna u bandhigo dadka.*

*Reymaa: Waan dhowahay, adigana waxaan kaaga mahadcelinayaa in aad aqbashay in aan is aragno, in kastoo markii aan Facebook iskala hadleynay aad i aamini weysay, waxaana Sharaf ii ah inuu I wareyso wariye Soomaaliyeed oo jin iyo insiba ay u arkaan qof wanaagsan.*

*Su'aal: Horta ma u fasaxan ahay in aan ku weydiiyo su'aal kasta, mase kula kaftami karaa inta uu wareysiga inoo socdo.*

*Reymaa: Haa waad fasaxan tahay, waadna ila kaftami kartaa, balse markii aad aragto in uu indhaheyga iftiin buluug ah ka soo baxayo su'aalaha iga jooji, waayo waa astaanta aad ku garan doontid in aan dhibsanayo waxa aad i weydiineyso, haddii marka aan xanaaqo aad acuudu billeysato dib danbe isuma arki doonno.*

*Su'aal: Hagaag! Waad ku mahadsan tahay in aad digniintaas i siisay, aan toos u guda galo e, bal waxaad ii sheegtaa magacaaga oo buuxa, da'daada, qoyska aad ka dhalatay tiradooda, iyo shaqada aad qabato?*

*Reymaa: Magaceyga waa Reymaa bintu Haguuf al Si'lat, waxaan jiraa 175 sano, waxaan qaan gaaray 5 sano ka hor, weli ma guursan, balse 30kii sano ee la soo dhaafay waxaan ahaa dhibbane jaceyl. Haddii aan kuu galo qoyskeyga, aabahey waxaa uu dhalay 3000 oo carruur ah, 2100 ka mid ah isku hooyo iyo aabe ayaan nahay, 900 kalena waa bah gooni. Aniga waxaa ila mataano aheyd 69 kale, waayo halkii mar hooyada jinka ah waxaa ay dhashaa 70 canug. Hooyadey waxaa ay dhashay 30 da'ood oo min 70 canug ah, kuwaas oo tiro ahaan noqonaya 2100 canug, 200 ka mid ah waxaa ay ku dinteen dagaalada, gaar ahaanna qaraxyada Alshabaab, 1900 weli waa ay nool yihiin.*

*Su'aal: Woow, tiro badan waaye 3000 oo carruur ah ee uu aabahaa dhalay, hooyadaana 2100 waa in ku filan, aabahaa kaliya ayey carruurtiisa qabiillo tahay, ee horta Jinniga Soomaaliyeed Qabiillo ma leeyahay sida dadka Soomaaliyeed oo kale, mise dhammaantiin waxaad tihiin hal qabiil oo ah jinni?*

*Reymaa: Jinniga guud ahaan waa labo ummadood oo waaweyn oo la kala dhaho ilmo Jin iyo bah Ibliis, kaddibna waxaa ay u sii kala baxaan 10 qabiil. Tobanka qabiil ee jinniga iyo ibliiska waxaa la kala dhahaa: Quullu, Hinna, Cifriit, Jaan, Naasnaas, Mariid, Baallis, Shiqi, Sheydaan iyo Si'lat.*

*Faraca Ibliis waxaa ku abtirsada Sheydaan, Mariid, Shiqi iyo Quullu, faraca jinni waxaa ku abtirsadaan inta kale. Sida Hinna, Jaan, Cifriit, Naasnaas, Baallis, iyo Si'lat.*

*Aniga ahaan waxaan ka dhashay qabiilka Si'lat oo ah qabiil jinniga ka mid ah ee ugu dhow dhanka insiga, muuqaal ahaan iyo dhaqan ahaan, waana qabiilka kaliya ee insiga ay is guursan karaan haddii ay timaado in ay is calfadaan.*

*Su'aal: Adiga waligaa maka fikirtay in aad xiriir jaceyl la sameyso qof insi ah?*

*Reymaa: Dhabtii kama sheekeyn karo xanuunka iga soo maray jaceylka aan u qaaday nin Soomaali ah, oo deggan Muqdisho, gaar ahaan xaafad u dhow xeebta Geel-Laq, jawaabtan gadaal ayaad iga weydiin doontaa, balse waxaan kuu sheegayaa jaceyl aan u qabay darteed xitaa waan isku dayay in aan xilliga uu xaaskiisa la joogo aan inta maskaxda ka mashquuliyo kaddibna iyada jirkeeda ugu dulseexdo si uu iyada bedelkeeda aniga iila raaxeysto. Mushkiladuse waxaa ay noqotay mar walba iyada ama isaga mid baa acuudu billeysanaya, anigana indho madoobaad baa igu dhacayey mar walba oo ay sidaas sameeyaan. Marar badan ayaan damaaciyey in aan isaga xoodaameysto marka ay iyaga raaxadoida dhameystaan, si aan taataabsigaas nolol uga dhigto, balse markii aan is iraahdo hadda ayey kuu gashay uun buu Alxamdu Lillaahi iska soo jaraa, kaddibna waxaa la iga xarrimaa in aan korkiisa taabto.*

*Su'aal: Sheekadan Jaceylkaagii iyo waayihii qosolka, xanuunka, naxdinta iyo silaca lahaa ee aad ka soo martay waxaan u dhiganeynaa qeybta danbe ee wareysiga, ee horta waxaad iiga warrantaa Soomaaliya imisa qabiil oo jinni ah ayaa deggan?*

*Reymaa: Jinka Soomaaliya deggan waa badan yahay tiro ahaan, kamana yarin dadka Shiinaha, balse Soomaaliya waxaa ku badan jinniga noociisa ugu daceebadda iyo dhaqanka xun, kuwa ugu nolosha xun iyo kuwa ugu*

*saqajaansan, waxaana sabab u ah xeebtan dheer ee dalka ku taala, waayo jinni xeeb ayuu degaa iyo meel qashin qub ah, Soomaaliyana xeeb aad u dheerna way leedahay, qashin qubkuna waa meel walba.*

*Su'aal: Dadka Soomaalida waa ay is dagaaleen, dowladdiina waa ay iska burburiyeen, 27 sano ayaan maamul la'aan nahay, idinka haddii aad tihiin jinka Soomaaliyeed, ma sida dadka oo kale ayaad dowlad la'aan yihiin, mise idinka maamul ayaa idindhisan?*

*Reymaa: Maamul ayaa inoo dhisan, dalkana anaga ayaa cadowga ka difaaceyna mooyee mar hore ayaa la qaadan lahaa. Jinkii dunida oo dhan baa Soomaaliya soo weeraray, xeebtii buu isugu yimid, meeshii aad lugta saartaba canug jinni ayaad ku istaageysaa, maalmaha jimcaha Liido kumanaan carruur jinni ah ayaa ku dhamaadaan, markii ay jinka aad u xanaaqaan ayey dhalinyarada insiga ah hadba midkoo badda ku jiitaan oo dilaan, balse sida jinka loogu dhameeyo Liido insiga uguma dhintaan. Tan kale, jinnigii dalalka deriska u dhashay ayaa sidoo kale dalka ku soo duulay, waana ka adkaanay oo waan iska difaacnay, waayo iyaga way naga tiro yar yihiin, jinniga Soomaaliyeed ayaa ka badan marka la isku daro kan Itoobiya iyo kan Kenya. haddii dadka Soomaaliyeed asaagood dadka ah isaga celin lahaayeen sida aan isaga celinay asaageen jinniga ah dalkan wuxuu noqon lahaa mid ka qurxoon kana qanisan dalalka SHUSHQAA iyo QIISQAAM.*

*Su'aal: Waligey ma maqal dalalka aad sheegeyso ee Shushqaa iyo Qiisqaam, ee maxaad u la jeedda?*

*Reymaa: Iga raalli noqo, Shushqaa idinka waxaad u taqaanaan Switzerland, Qiisqaam dalka la yiraahdana waxaad u taqaanaan Qadar, balse anaga Qadar waxaan u naqaanaa gacanka Qiisqaam, Switzerland waxaan u*

Abdulkadir Ulukow

*naqaanaa Shushqaa, waayo tuugada ugu waaweyn jinniga adduunka ayaa deggan, SHushqaa macnaheedu waa Boqotooyadii tuugada, waana halka jinniga kuwiisa kibray ay dunida ka maamulaan.*

*Su'aal: Hadda ka hor waxaad ii sheegtay in 30 sanadood aad jecleyd nin Soomaali ah oo 3 xaasle ah, maantana waxaad ii sheegtay in aad 5 sano ka hor uun aad qaangaartay oo aad 175 sano jirtid, bal sheekadaas ii dul mar?*

*Reymaa: Ninkaas wuxuu ahaa nin aad u wanaagsan, waa nin jinniga dadka ka daweeya, waana nin cibaado badan, balse iimaankiisa inuu sax yahay aniga ma hubi, waayo waxay dadku dhahayeen waa kitaab gaablow. Ninkaas waxaan arkay isaga oo wiil insi ah ka saaraya gabar jinni ah oo ka mid ah nooca jinniga ee JAANKA loo yaqaano. Wiilka waalnaa ee uu JAANKA ka saarayey waxaa ku jirtay gabar jinni ah oo u dhalatay qabiilka Jaan, magaceedana waxaa la dhihi jiray Zaitu, si xun ayuu ninkaas u dhibaateeyey gabadhii Zaitu markii uu ka saarayey ninkii ay ku darsoontay. Iyada oo af jinni ku oyneysay ayaan maqlay, markii aan ku soo leexday waxba uma qaban karin, waayo waxaa shidnaa luubaan, xaar dameer iyo wax yaabo kale oo aanan u adkeysan karin. Zaitu jaceyl dartiis ayey wiilka ugu darsoontay, balse markii xoogga lagaga saaray way is dishay.*

*Su'aal: Jinniga ma isku af ayuu ku hadlaa mise waa kala af?*

*Reymaa: Jinniga waa isku af, balse noocyada bah Ibliis ku abtirsada ayaa waxay yaqaanaan luuqad walba oo dunida ka jirto mid jinni iyo mid insiba, waayo iyaga shaqadooda dhan ayaa ah in ay dadka iyo jinnigaba waswaasiyaan, diinta ka weeciyaan. Sidaas darteed qof walba luuqadiisa ayey kula hadlaan, qalbiga ayeyna kala hadlaan.*

Abdulkadir Uukow

*Su'aal: Jinniga dadka ma dilaa isaga, mise isaga uun baa la dilaa?*

*Reymaa: Jinniga midba si ayuu dadka u dhibaateeyaa. Tusaale jinniga Quullu waa mid awood u leh in uu wax walba isu soo ekeysiiyo, dadka wuu dilaa, dhiiga ayuu ka cabbaa, hilibka dadkana wuu cunaa, qubuuraha ayuu u badan yahay. Jinniga Hinna waa jinni inta badan isu soo ekeysiiya xaywaanada laga baqo sida eeyaha, waraabaha iyo dawacada, balse dadka ma dilo oo sida Quullu uma halis badna, Cifriit waa mid xoog badan oo wax walba burburin kara, balse Soomaaliya kuma badna, JAAN ayaa aad ugu badan Soomaaliya, jufadiisa ugu laandheersan waxaa la dhahaa Af-Ku-Dable baadiyaha ayuu ku badan yahay, wuxuuna mararka qaar isu ekeysiiyaa waxa loo yaqaano Daluuliyaha oo ah Dabeyl uu JAANKA kiciyo, inta kale Sheydaan ayaa ugu dhib badan, waa kan dadka ka hor istaaga in ay danahooda qabsadaan. Wuxuu dadka ku dhex abuuraa fidno, wuxuu qofka ku raraa waxyaabo culeys badan si qofka uu caajis mar walba u ahaado, waana midka dadka ku rida Zinada, Dilka, xatooyada, shirkiga, iyo dhammaan denbiyada kabaa'irta ah.*

*Su'aal: Adiga waligaa qof insi ah ma dhibaateysay, mise ma ku darsoontay?*

*Reymaa: Maya, aniga insiga waan jeclahay, haddii inta aan insi caadi ah noqdo nin ka guursado misena dhalshadayda jinninimo heysan karo waan jeclaan lahaa, waayo raaxada insiga ayaa ka wanaagsan tan jinniga, sidaas darteed gabdhaha jinniga ah waxaa ay jecel yihiin ragga insiga ah, waana sababta ay ugu darsamaan.*

*Su'aal: Sidee bey raaxada insiga uga wanaagsan tahay midda jinniga?*

Abdulkadir Dukow

*Adigana labada raaxo miyaad wada dhadhamisay, midda jinniga iyo midda insigaba?*

*…..**Fadlan La soco Waraysiga Qeybtiis Labaad***

## *WAREYSIGII: GABADHII JINNIGA AHEYD EE REYMAA, QEYBTII 2-AAD*

*Dib U Habeytii **Abdulkadir Uukow***

*Wareysiga qeybtiisa koowaad waxaa uu inoo marayey aniga oo Reymaa weydiinay su'aal la xiriirtay in ay sharaxdo sida ay insiga uga raaxo wanaagsan yihiin jinniga. Qeybta labaad waxaa ay inooga billaabaneysaa isla su'aashaas iyo jawaabteeda, waana sidan.*

*Su'aal: Bal ii faahfaahi sidee bey raaxada insiga uga wanaagsan tahay midda jinniga? Adigana labada raaxo ma wada dhadhamisay, midda jinniga iyo midda insigaba?*

*Reymaa: Abuurista jinniga iyo insiga ayaa asal u ah sababta ay xaga raaxada ugu kala wanaagsan yihiin. Tusaale insiga jirkiisa oo dhan waa raaxo, jinniga jirkiisa raaxo ma leh illaa uu insi isu ekeysiiyo, xubin walbana oo insiga jirkiisa ka mid ah waxaa ay ka qeyb qaadataa xaraaradda la xiriirta raaxadda inta ay labada qof isxoodaaminayaan, balse jinniga sidaas ma ahan, dareenka xoodaamiska ma leh jinniga.*

*Haddii aan tusaale ku siiyo jinniga waxaa uu leeyahay gacmo ka duwan kuwa insiga. Insiga gacmihiisa waxaa ay leeyihiin 5 farood oo mid walba xubno laalaabma ay leedahay, far walbaana kaligeed ayey sida ay doonto u dhaqdhaqaaqi kartaa, balse jinniga wuxuu leeyahay 3 farood oo isku dheggan, xubno ay ka laabmaanna aan laheyn.*

Abdulkadir Uukow

*Sidaas darteed ninka jinniga ah, gacmihiisa si kasta oo uu ugu taataabto naagta jinniga ah jirkeeda wax raaxo ah kama dareemeyso, waayo waa iyada oo alwaax lagugu taataabanaayo oo kale, waxaana u sabab ah in ay yihiin 3 farood oo isku dheggan, wax xibno ahna aan laheyn oo isku simman, adeygna ah.*

*Balse insiga, farihiisa baa midba goonideeda u dhaqaaqeysaa, jirkii bey taataababeysaa, waa ay jilicsan yihiin oo jirka way u roon yihiin, kaddibna farahaasi siyaabaha kala geddisan u dhaqdhaqaaqaya waxaa ay taabashadooda jirka ku abuuraysaa dareen labada qof isu soo jiida. Tusaale haddii aad farahaaga inta dhab isku wada siiyo qof jirkiisa ku taabato dareen ay bixinayaa lama mid ahan marka faraha oo jilicsan ay jirka si hal haleel ah u salaaxayaan. Mar walba oo ay shanta farood wada dhaqaaqayaan dareen iyo xaraarad ayaa ka abuurma, waana nimco uu ALLAAH insiga ku maneystay.*

*Ha ila yaabin haddii aan xoogaa xaajada marada ka qaado. Faraha ninka ragga ah qeyb weyn ayey ka qaataan dareenka gabadha haddii faraha lagu salaaxo qeybaha dareen wadka, gaar ahaanna canbarka, horaadada iyo hareeraha xuddunta.*

*Su'aal: Adiga waxan oo dhan aad sharaxeyso sideed ku ogaatay, maaddaama aadan weli guursan?*

*Reymaa: Aniga 30 sano ayaan daawanayey Soomaali habeenkii reerkooda dhaqaneysa. Carruur badan oo jidadka iiga hor timaadda ayaan marqaati u ahaan habeenkii hooyadood ay caloosheed galeen, xaaladda jinniga waan iska ogahay, waayo aniga ayaa ka dhashay, waan la socdaa, sababta aan nin insi ah u jeclaaday waa raaxadaas tirade badan ee aan sheedda uun ka daawado darteed.*

*Runta haddii aan kuu sheego gabdhaha jinniga ah aad ayey u daawadaan*

marka ay insiga isu hawoodaan, weliba gabdhaha jinniga ah aad ayey u ooyaan oo u ilmeeyaan marka ay daawanayaan xaasaska insiga ah ee gogoshooda ku dhex dhaqmaya oo isla faraxsan.

Su'aal: Gacmaha garanay, lugaha ka warran? Ma jiraan xubno kale oo insiga iyo jinniga ku kala duwan yihiin oo sabab u ah farqiga raaxada?

Reymaa: Haa! Waxaa ka mid ah lugaha, jinniga lugihiisa kuwa ugu qurxoon waa qoobka fardaha, waa kuweygan oo kale, hadda weliba aniga oo insi isugu kaa ekeysiiyey ayaanan lugaheyga doorin karin, meesha kaliya ee qofka jinka ah laga eego waa lugaha, si kasta oo uu isugu ekeysiiyo dadka lugaha ba doorsoomayaan.

Teeda kale, jinniga, marka laga reebo kuwa ka dhashay qabiilka Si'lat iyo Baallis inta kale lugahooda waa lugo sida dugaagta oo kale ah, waxaa ay leeyihiin cijiyaha libaaxa oo kale, in ay wax mudaan ama ay wax gooyaan mooyee laguma raaxeysan karo.

Su'aal: Qof yaab leh ayaad tahay, anigii insiga ahaa ayaad igaaga aqoon badan tahay wax yaabo badan oo aad halkan ku sheegtay oo la xiriira farqiga raaxada ee jinka iyo insiga u dhexeeya. Bal waxaad ii sheegtaa adiga waligaa raaxo ma dhadhamisay?

Reymaa: Maya! Aniga xagga nolosha jinniga wali waan yar ahay, 175 sano oo kaliya ayaan jiraan, waa in aan 210 sano aan gaaraa si uu nin jinni ah ii damaacin karo, balse marka loo eego insiga qof weyn oo raaxada ka bixi karta ayaan ahaan lahaa haddii uu nasiibka intuu I saacido aan heli lahaa nin insi ah oo aan iga dideyn oo I guursada. Hase yeeshee raaxadda insiga ayaan daawashadeeda ka dhergay oo kana maqsuuday, waayo dadka iyaga

Abdulkadir Ujukow

*oo aan ii jeedin ayaan inta dariishada u fuulo ka daawadaa, kuwa deggan guryaha suuliga ku dhex leh qolalka jiifka iyo kuwa hoteelada deggan waxaan u fadhiistaa irridda suulliga qolka ku dhex taalla, tartiibteyda ayaan iska daawadaa, teleefoonkeyga ayaan ku duubtaa, balse waa teleefoon jinni oo jinni uun baa daawan kara. Haddii aan xoogaa qalbi xanuun ah dareemo marka ay raaxadooda dhiindhiinka mareyso waan isaga yara jeestaa, haddana waan iska soo milicsadaa. Mararka qaar inta ay aacuudu billeystaan ayaan cararaa oo suulliga ayaan galaa, shanqarta iyo neeftuurka ayaan halkaas ka dhegeystaa, iyadaba eber ayey dhaantaa.*

*Su'aal: Balaayo ayaa ka dhacdaye, oo waa la ceeboobay haddiiba aad dadka duubeysaane, walba ma jiraan dad aadan arki karin?*

*Reymaa: Haa! waxaa jira dad badan oo mar walba adkaarta aqrista, kuwaas waa naga xaaraan in aan cawradooda aragno, balse dadka caadiga ah ee aan bisinka inta badan xasuusan waan iska daawanaa, waana duubaa markii aan doono.*

*Su'aal: Waxaa la sheegaa in jinniga ay hawsha raaxada kala qeyb galaan dadka marka ay bisinka hilmamaan, warkaas ma jiraa?*

*Reymaa: Haa, balse jinniga oo dhan ma ahan, waa ibliiska iyo qabiiladiisa sida Sheydaanka, Mariidka, Shiqiga iwm. Weliba sheydaanka waa xaasid, qofka bisinka hilmaamo cantuuftiisa ayuu ku tuftufaa, wasaq ayuu ku dhex daadiyaa labada qof, ur aysan muuqaalkiisa u jeedin ayuu dhexdooda ka abuuraa, ninka xaniinyaha ayuu ka jiidjiidaa si uu u himad jabiyo, gabadhana dhidid sheydaan oo uraayo ayuu sanka u mariyaa, si ay u moodo in ninka dhididkiisa uu soo uraayo.*

*Su'aal: Waxaa ay dad badan jecel yihiin in ay ogaadaan sida aan isku barangay, bal inta aanan u gudbin qeybta ku saabsan sida aan labadeena isku barangay, waana ku tusay dhawr farriimood oo ay dad badan arrintaas igu soo weydiiyeen, marka hore waxaad ii sheegtaa ma jirtaa wax aadan xusin oo ah farqiga raaxada jinniga iyo insiga oo aad ku dareyso inta aynaan ka gudbin?*

*Reymaa: Haa, tusaale Dumarka jinniga marka ay suuraddooda caadiga ah ee jinniga leeyihiin xubinta ratanka waxaa ay kaga taallaa xabadka kore, ninka jinniga ahna waa sida ninka insiga ah o kale, sidaa darteed ninka jinniga ah gabadha xaaskiisa ah marka uu doonayo in uu ka xaajo gutto waa in uu xabadka ka fuulo, taasina waa dhibaato, waayo gabadha jinniga ah jirkeeda waa qafiif, culeyska ninka jinniga ahna ma xamili karto, sidaas darteed iyada oo suuxsan uun buu ninka jinka ah ka muraadsadaa, markii uu ka tago cabbaar kaddib ayey soo miirsataa.*

*Intaas waxaa dheer jinniga afkiisa carrab ma leh, carrab dhan ma leh, wuxuu leeyahay sakluul, sakluulku waa laf sida qaaddo camal ah oo cuntada uu afka gashado u qaada dhanka dalqada, waana sida birta oo kale oo uma jilicsana sida carrabka insiga. Haddii inta faruuryaha qofka kale lagu taabto wax ma xaxanteyn karto sakluulka, sidaa darteed ninka jinniga ah naagtiisa ma baasheyn karo, faruuryo ma leh oo afkiisa waa sida eyga oo kale. Raaxada ninka jinniga ah waa mid dhunkasho iyo baasho la'aan ah, middasna in aysan macne laheyn adiga ayaa ka marqaati ah oo qudhaada xaasle ayaad tahay, marka insiga waa in uu ALLAAH ugu shukriya nicmadaas weyn uu ku galladeystay.*

*Su'aal: Waaw! Maankeyga ayaad gadi rabtaa adiga, waxan oo dhan sideed ku ogaatay?*

Abdulkadir Uukow

*Reymaa: Weli wax badan ma aan baran, waayo waan yarahay, balse marka aan gaaro 500 oo sano, oo aan jinni iyo insiba raaxo la wadaago, markaas in aad i wareysato ayaa fiicnaan laheyd. Haddii aan kuu sheego xogahan sida aan ku ogaaday, aniga ayaa jinni ka dhashay, xogta jinniga waan ogahay, insigana muddo sanado badan ah ayaan guryo badan oo kuwooda ah tagayey oo arkayey sida ay u dhaqmaan iyo sida ay u raaxeystaan.*

*Su'aal: Reymaa! Dad badan ayaa isoo weydiiyey Abukar Albadriyow sideed isku barateen gabadhan Reymaa ah, hadda ka horna waad iga diidday arrintaas in aan dadka la wadaago, bal hadda adiga tixgelinaya codsiyada dadka asxaabteyda ah wax yar uga taabo isbarashadeenii sida ay ku timid maadaama ay asxaabta aad u xiiseynayaan arrintan?*

*Reymaa: Aniga horey ayaan kuugu sheegay in aan kugu soo bartay Bandhigii buugaagta ee sanadkii hore ka dhacay Muqdisho, markii aan arkay in dad badan kugu mashquulsan ayaan anigana cinwaankaaga qortay, adiga oo dad u sheegaayo ayaan iska qortay, geed tallaalka hoolka u dhaw ayaan saarnaa markaas.*

*Gabar aan gurigeeda wax ka degganaa, balse iyada aan i ogeyn, ayaa meesha joogtay, gabadhaas ayaan iska soo raacay, maadaama ay si qurux badan u lebisneyd, waxaan mooday in ay subaxaas ninkeeda u socotay, waxaa qabo nin xildhibaan ah oo madaxtooyo seexan jiray. Balse sida aan u soo daba socday uun bey ina keentay Hoteelka City Palace oo ku yaallay meel aan ka fogeyn xeebta Liido ee aan deggan nahay. Markiiba Facebook ayaan kugu soo darsaday, waad iga aqbashay. Muddo ayey igu qaadatay in aan kula soo hadlo, waayo waxaan ka baqayey in aad i aamini weyso, laakiin waxaan ka yaabay indha adeygaaga.*

Abdulkadir Uukow

*Reymaa*: *Ma xasuusataa su'aashii ugu horeysay ee aad i weydiisay Abukarow?*

*Albadri: Maya! I xasuusi*

*Reymaa: Waxaad igu tiri "Waa qofma?" anigana waxaan kugu dhahay "waa gabar" kaddibna waxaad igu tiri "Ma ku aqaanaa?" waxaan kuugu jawaabay "Maya" kaddib waxaad igu tiri "kheyr sheeg"*

*Su'aal*: *Waan fahmay! Adiga dadka caadiga ah ee insiga ah Facebook maku darsataa oo asxaab kale maku leedahay, jinnigase baraha bulshada ma isticmaalaa?*

*Reymaa: Haa! 2000 ka badan asxaab ah ayaa iigu jirta. Jinni Facebook wuu ka buuxaa, haddii aanan Facebook ku jirin sideen ku ogaadaa meesha uu habeenkaas kheyr ka jiro. Kuwa Love iyo sawirro ber-ka-islaan ah isu diraaya ayaan farriimahooda gaadgaadaa, markaas ayaan meesha ay joogaan ugu tagaa, waan iska daawadaa marka ay hawshooda qabsanayaan, intaas ayaa ii dan ah.*

*Su'aal*: *Hadalkaaga soo looma fahmi karo cabsi gelin, Soomaaliya meel ka baxsan waligaa qof ma u raacday?*

*Reymaa*: *Maya, Muqdisho iyo Soomaaliya meelo ka mid ah waligey ma dhaafin. Haddii aan fogaado Hargeysa ama Boosaaso ayaan ku soo luga baxsadaa, habeenkii marka uu nus gaaro waan ka soo laabtaa.*

Abdulkadir Uukow

*Su'aal: Jinniga aaladaha internet-ka ma isticmaalaa, teknoologiyad isaga soo saartayse ma leeyahay?*

*Reymaa: Jinniga dhanka awoodaha dabiiciga ah ayuu ku dheereeyaa, balse tan wax soo saarka dhanka Teknoolojiyada kuma dheereeyo, balse wuu isticmaalaa. Tusaale jinniga dad caadi ah oo Muslim iyo Gaal leh, Soomaali iyo ajnabi leh ayey isla shaqeystaan, noloshu waa isfaham kaliya, sidaas darteed teknoolojiyada ayey isla adeegsadaan, jinni ayaa si caadi ah farriin loogu diraa iimeyl "email" ah, isagana wuu ka soo jawaabaa, waa caadi waxaas.*

*Su'aal: Wareysigeena wuu inoo socon doonaa, balse waxaan doonayaa in aan wax kaa codsado haddii aad iga aqbasho?*

*Reymaa: Iga codso haddii aysan i miirtaabaneyn.*

*Su'aal: Dad badan oo asxaabteyda ka mid ah ama wareysigan aqrin doona waxay jeclaan lahaayeen in aan muuqaalkaaga uga sheekeeyo, haddeer waxaad i hor fadhidaa adiga oo leh muuqaalkii gabar insi ah, balse lugahaaga uun baa qoobkii fardaha oo kale u sameysan, suurto gal ma tahay in aan ku arko adiga oo leh muuqaalkaaga jinniga ah ee dabiiciga ah? Igana ballan qaad in aadan I dhibaateyney!*

*Reymaa: khiiiiiiiiiiiiiiiiiiiiiiiiiiiiiiiiiiiiiiiiikh Guguguwahuga! Xeeeeex xiiiiiiiix xuuuush!*

Abdulkadir Uukow

*Su'aal: Yaa ALLAAH! Reymaa iga raalli noqo, Please! Please! Fadlan raali noqo! Jawiga caadi ku soo celi please!*

*Reymaa: Su'aalaha qaar iska ilaali, si aanan kuugu talo galin in ay dhibaato kuu gaarto ma rabi. Hadda waxaad ku sigatay in ay iirmadeyda ku saaqdo.*

*Su'aal: iirmo waa maxay?*

*Reymaa: Marka aan xanaaqo indhaheyga waxaa ka imaanaya iftiin buluug ah, kaddibna mid jaalle ah, sida haddaba aad arkeysay, haddii iftiinkaas indhaha uu guduud noqon lahaa kaddibna aan ku soo eegi lahaa waad guban laheyd.*

*Su'aal: Ka gudub taas, wareysigeenii ayaan wadaneynaaye hadda caadi ma tahay?*

*Reymaa: Haa! Ka soco.*

*Su'aal: Waxaad ii sheegtay in jinniga ay 3 farood leeyihiin, haddeer oo aad insi isu ekeysiisay waxaad leedahay 4 farood kaliya, taas maxaa u sabab ah, ma ii fasiri kartaa?*

*Reymaa: Hadda jirkeyga meelo badan ayuu kaga duwan yahay insiga, lugaha waa qoob fardeed oo kale, faraheyga waa 4 farood gacan walba iyo lug walba, ilkaheygana waa 3 kor ah, 3 hoos ah, iyo 4 goos oo kaliya oo*

Abdulkadir Ulukow

*hoos ah, balse qof aanan aniga dareensiin ma arki karo.*

*Su'aal: Kursigan aan kuu dhigay si caadi ah uguma fadhidid, caadi uma fadhiisan kartid miyaa, adiga dhan waad dhaqdhaqaaqeysaa, si uun baad u fudfuddahay, maxaa u sababah?*

*Reymaa: Jirkeyga wuxuu ka sameysan yahay 400 oo moollo-xubneed, halkii mar ee aan boodo waxaan ku duulli karaa xawaare 1500 oo meyl daqiiqaddii ah, adiga oo halka ila fadhiya ayaan inta Hargeysa tago, kismaayo tago haddana 5 daqiiqo gudahood kuugu soo laaban karaa, marka jirku wuxuu leeyahay cufjiid dabiici ah oo u diidaya in uu meel ku nagaado.*

*Su'aal: Waxaan ku weydiinayaa su'aal adag, jinniga wuxuu ku darsamaa insiga, wuuna waalaa, taas beddelkeeda insiga miyuu ku darsami karaa jinni, mase idin waalli karaa qof insi ah sida aad idinkuba u waashaan insiga?*

*Reymaa: Maya, dadka qaar waxaa jira inta sixirka bartaan, kaddibna jinniga ku shaqeysta, kuwaas in kastoo ay dembi adag ku dhacaan xag diin ahaan haddana jinniga way ku shaqeystaan wayna ka awood badan yihiin, weyna dhacdaa in insiga gaar ahaan kuwa jinka dhaawa ama dadka ka daweeya ay awood u leeyihiin in ay jinka arkaan oo dilaan, balse inta ku darsamaan ma waali karaan, awooddaas insiga lama siin.*

*Su'aal: Ma u fasaxanahay in aan wax kaa weydiiyo, siyaasadda, dhaqaalaha, diinta iyo hantidda ay leeyihiin jinniga?*

Abdulkadir Uukow

*Reymaa: Haa, balse su'aalahaaga ha asluubeysnaadaan.*

*Su'aal: Inta aanan ku weydii su'aalahaas haddii aan dabeecadaha jinniga wax kaa weydiiyo horta jinnida miyuu cunaa hilibka insiga, yacni dadka ma dilaa, haddiise uu dilo oo cuno waa noocee jinnigaas bal si ay aqristayaasha isaga ilaaliyaan?*

*Reymaa: Huuuuuuuuuuuuh! Haah! Jinniga qaar wuu dilaa dadka, dhiigga ayuu ka nuugaa, wuuna cunaa hilibka dadka, balse kulli jinniga ma wada ahan, tusaale jinniga la yiraahdo Quullu waa kan ugu halissan, aad ayuu dadka u ugaarsadaa, wuxuu isu ekeysiiyaa bahal sidan libaax, marka uu qofka dilo kaddib lama arko, dhiigga ayuu qofka ka nuugaa, beerka ayuu kala baxaa, ama wadnaha. Jinniga Hinnaa sidoo kale waa halis, Jaanka dadka wuu gubaa isagana, kaddibna wuu cunaa, wuxuuna ka soo raacaa qabuuraha habeenkii, balse qabiilkeyga Si'lat hilib dhan ma cunno.*

*Ibliiska iyo sheydaanka iyaga awood ay qof insi ah wax ku yeelaan ma leh, balse waxay awood u leeyihiin in ay qofka fidneeyaan. Qalbigaaga oo adigii lahaa lagaa qariyey ayey iyaga daalacan karaan oo wixii ay doonaan ayey kuugu sheegi karaan qalbiga.*

*Su'aal: Insiga waxaa ay leeyihiin hanti aad u badan, waxaa ku jira maalqabeenno waaweyn oo muslim iyo gaalba leh, idinka jinni haddii aad tihiin ma leedihiin maalqabeenno?*

*Reymaa: Haa, dadka anaga ayaa ka maalqabeensan. Jinniga maadaama uu aad u dhaldhalo wuu tiro badan yahay, dadka adduunka ku nool wuu ku 10 laabmaa, balse jinniga maalqabeenada ah waa malyuumaad, qaar baa*

*buuro dahab ah leh, qaar baa dal dhan kaligood leh oo inta la nool ay addooman u yihiin, qaar baa suuqyada lagu iibiyo waxyaabaha xun xun oo ay u xiran yahay oo kaligood leh, marka maalqabeenadeena ma yara.*

*Su'aal: Adiga hantida aad leedahay intey la ektahay?*

*Reymaa: Waa su'aal wanaagsan… Wareysiga qeybtiisa seddaxaad ayaan jawaabtan ku billaabeynaaye nabadey…. **Fadlan ….. La soco qeybta 3aad***

## *WAREYSIGII: GABADHII JINNIGA AHEYD EE REYMAA, QEYBTII 3-AAD*

*Dib U Habeyntii **Abdulkadir Uukow***

*Wareysiga qeybtiisa labaad waxaa uu inoo marayey aniga oo Reymaa weydiinay su'aal la xiriirtay hantida ay leedahay iyo inta ay la eg tahay, qeybtan 3aad waxaa ay inooga billaabaneysaa isla su'aashii iyo jawaabteeda, waana sidan.*

*Su'aal: Adiga hantida aad leedahay intey la ektahay?*

*Reymaa: Haddii aan runta kuu sheego jinniga dadka ugu hantida yar ayaan ka mid aha, hase yeeshee haddii loo eego insiga hanti badan ayaan leeyahay, Xitaa Milkiilayaasha Hormuud iyo Dahabshiil ee Sheekh Axmed-Nuur Jimcaale iyo Cabdirashiid Ducaale waan ka hanti badnahay, xoolo nool, hanti guryo ah, dukaamo waaweyn oo ganacsi iyo maraakiib ayaan leeyahay, laakiin ogow ma doonayo in aan hantideyda tuso shan faroodle, waayo shan faroodle dhac iyo boob ayaa ka soo haray. Lagama yaabo in*

Abdulkadir Uukow

*Jinni uu jinni kale xoolihiisa uu damaaciyo amaba dhaco, shan faroodle aniga ayaa arkay iyaga oo is dhacaayaan.*
*Su'aal: Hagaag! Hantidaada waad ii sheegtay, lagaamana dhacayo oo kaama sheegayo, balse haddii aan ku weydiiyo arrimo qoyskaaga ku saabsan dhib miyaad u aragtaa?*

*Reymaa: Dhib uma arkayo ee soo daa.*
*Su'aal: Aabahaa magiciisa waad ii sheegtay, waa Haguuf al Si'lat haddii aanan qaldaneyn, bal waxaad ii sheegtaa hooyadaa magaceeda, iyo walaalahaa magacyadooda qaar ka mid ah, si ay dadka u fahmaan noocyada magacyada ee aad baxsataan?*

*Reymaa: Hooyadey waxaa la dhahaa Ruuxaani Heykal al Si'lat, waa BAAC-WALE, idinka baac-wale waxad dhahdaan injineer, hooyadey jidadka Soomaaliya ee jinka ka isticmaalo caasimadda badankii iyada ayaa dhistay, jidka buundooyinka badan ee loogu magacdaray Janaraalkii aasaasay Ciidanka Xoogga jinniga Soomaaliyeed Janaraal Shumac Shuu Shu xitaa iyada ayaa dhistay, sawirkan eeg, afartan jid ee is korsaaran iyada ayaa dhistay waana bartamaha caasimadda Soomaaliya ee Muqdisho.*

*Walaashey aan aad u jeclahay ee mataanteyda ahna waxaa la dhahaa Ru'yatul Ceyn, waxay ku taqsustay cilmiga cirbixiyeennimada, waa qof aad ugu dheereysa garashada cilmiga xidigiska, waa qof mucjiso ah oo karti badan, mar ay meerayaasha jirto iyo mar ay dhulbaraha toobeyso iyo mar ay kubadda jilibka dheeleyso uun waaye. Walaalahey inta kale ma doonayaan in aan magacyadooda u sheego shan faroodle, waayo hawada insiga uma soo deggaan inta kale, magacyadooda in lagu sheego hawo aan tan jinniga aheynna ma ogola.*

*Su'aal: Kubadda jilibka maxaad ula jeeddaa?*

*Reymaa: Anaga kubadda cagta ma dheelno, waxaan dheelnaa kubadda jilibka, Janaraal Shumac Shuu Shu wiilka uu awowga u yahay ee Duuriyaa la*

Abdulkadir Uukow

*dhaho ayaa ugu laacibsan, xitaa Ronaldo iyo Messi waxba uma oga, 400 oo kubadda dahabka ah ayuu qaaday, 500 sano ee la soo dhaafay isaga ayaa ugu laacibsanaa horyaalka kubadda Jilibka Soomaaliyeed.*

*Su'aal: Walaashaa Ru'yatul Ceyn adiga ayaa iskeen bartay oo waa gabar aad u wanaagsan, dhabtiina waan doonaye in aan la sheekeysto, habeenkii aad i bartay ee aan dabaqa saree e Hotelka Jazeera iskula shaaheynay ka soke ma aan arkin, mar aan Facebook iskula hadalnay waxay ii sheegtay in ay Kismaayo joogto, kaddibna waan waayey, halkey hadda ku danbeysaa, Kismaayo miyey deggan tahay mise safar uun bey ku joogtay?*

*Reymaa: Ru'yatul Ceyn Kismaayo ma deggana, balse markii aysan meerayaasha hawl u jirin ayey meeshaas isaga nasataa, guri weyn oo qasri ah ayey Kismaayo ku leedahay, meel u dhexeysa Xeebta iyo Madaxtooyada Axmed Madoobe, meeshaas ayey isaga nasataa. Sababta ay meeshaas u aaddo haddii aay kuu sheego waxaa jira wiil ay suurihiisa aad uga hesho oo reer Kismaayo ah, halkaas ayuuna ku nool yahay, hoteel Kismaayo ku yaal ayuu ka shaqeeyaa, marka inta badan waqtigeeda waxay ku qaadataa Kismaayo si markii ay u baahato ay wiilkaas sheedda uga daawan karto iyada oo fadhida barandada qasrigeeda.*

*Su'aal: Wiilka isaga ma yaqaanaa walaashaa Ru'yatul Ceyn, mase og yahay in ay jeceshahay?*

*Reymaa: Ma yaqaanno, marar badan ayey isku dayday in ay isbarto, balse waxay ka baqday in uu waasho, waayo waa qof aad u qalbi jilicsan oo aan lagu deg degi karin. Aniga ayey ila tashatay, waxaan ku iri u sug inta uu ka gaarayo 30 jir, markaas ayey ragga qalbi adeyg billaabaane, markaas ayey billaabi doontaa in ay dareensiiso in ay jirto gabar aan shan faroodle aheyn oo jaceyl u ugu heysa kasha iyo laabta, waa iska dhibaato in gabar aan kugu uumis aheyn ay ku jeclaato, haddase qadartii baa dhacdaye maxaa la sameyn karaa.*

*Su'aal: Siduu ku billowday jaceylka Ru'yatul Ceyn ay u heyso wiilkaas, magiciisa ma ila wadaagi kartaa?*

Abdulkadir Ulow

*Reymaa: Wiilka magiciisa ma sheegayo, waayo in ay dadka qalad ka fahmaan ama uu isaga sas ku dhaco ma doonayo, balse sida ay ku jeclaatay walaashay ayaa aheyd in wiilka ay hooyadiis aad u jecleyd markii uu yaraa, markii ay wiilkeeda eegeysana waxaa ay u eegi jirtay si aad raxmad u leh oo aysan ka fikirin in ishaas raxmadeed ee tirade badan ay wiilka dhibaato ku noqon karto.Habeen habeenada ka mid ah wiilka hooyadiis ayaa waxaa ay daawaneysay wiilkeeda oo dhawr bilood jir ah oo hurda, raxmadda qalbigeeda ka buuxday darteed ayey illin ka timid hooyadii indhaheeda, waayo waa curadkeeda, wayna jeceshaya, kaddibna illintaas iftiinkeeda ayaa walaashey oo xeebta Kismaayo iska mareysa indhaha ka cawirtay, markii ay soo eegtayna waxaa ay aragtay hooyadan wiilkeedii jaceyl dartiis ugu kor ilmeyneysa hadda aan is ogeyn oo illintii aan iska masaxeyn.*

*Ru'yatul Ceyn waa qof ahlu diin ah, wiilkii illintii waa ay ka tirtirtay, si aysan illintaas il qumayo wiilka ugu noqon, kaddibna wiilkaas illaa yaraantiisii ayey iska jecleyd oo xaaladiisa ayey sheedda kala socon jirtay, sidaas ayuu qalbigeeda ugu dhismay caashaqa qalbigeeda buux dhaafiyey ee Kismaayo dejiyey.*

*Aniga hooyooyinka Soomaaliyeed waxaan kula talin lahaa in mar walba oo ay il qooraansi ku sameynayaan ilmahooda yar ay dhahaan Maashaa ALLAAH! Waayo hooyada isheeda ayaa canugeedii ku noqon kartaa dhib, balse iyada ma dareemeyso.*

*Su'aal: Hooyada Soomaaliyeed ee qoraalkan aqrin doonta si ay taladaada uga faa'iideysato maxaad kula talineysaa in ay sameyso, dabcan waxaan ka hadlayaan marka ay ubadka xanaaneyneyso?*

*Reymaa: Horta hooyo walba ha ogaato marka ay canugeeda il naxariis leh ku eegeyso waxaa ay boggeeda ka dareemeysaa belbel yar oo jaceyl iyo naxariis dartood ah, marka ay sidaas dareento waa in ay tiraahdaa Maashaa ALLAAH, waa in ay dhahdaa Subxaanaka Yaa Cadiim, waa in ay dhahdaa Yaa ALLAAH, Yaa Raxmaan, Yaa Raxiim, waxaa kale ee aan kula talin lahaa in ilmaha yar la ag dhigo rikoor ama teleefoom uu ka shidan*

*yahay quraan, waayo Quraanka Shayaadiinta way ka cararaan, ishana wuu ka celiyaa ilmaha, qalbiga canugana wuxuu ku reebaa saameyn uu canuga ka faa'iideysto marka uu yara koro oo dugsiga la geeyo. Waayo quraankii markii uu yaraa loo shidi jiray ayaa qalbigiisa ku suureysan oo ka caawinaya xafidaada.*

*Su'aal: Waa talo wanaagsan, waxaa laga yaabaa in ay dadku is weydiiyaan Reymaa iyadu diin noocee ah ayey heysataa, bal maxaad kaga jawaabeysaa?*
*Reymaa: Alxamdu Lillaah! Soo iima jeedid sida aan u asturnahay, Rabbi SW ayaa inoo nimceeyey, aniga iyo dhammaan ehelkeyga waxaan nahay Muslimiin, Ilaah iimaanka ha inagu dilo, aakhirana Janno ha ina geeyo.*

*Su'aal: Aamiin! Mahadsanid marka hore taladaada wanaagsan, haddii aan u soo laabto arrintii wiilkii ay walaashaa jecleyd, isaga wali ma arkay walaashaa, xitaa yaraantiisiiba ha ahaatee?*

*Reymaa: Yaraantiisii haa, laakiin markii uu 2 sano soo kaaray kaddib ma arkin. Walaasheey Ru'yatul Ceyn waa ay ciyaarsiin jirtay wiilka isaga oo yar, weliba hooyadiis ma dareemi jirin in wiilkeeda ay gabar kale oo aan ku uumis aheyni ay u ciyaarsiineyso. Isagana waa ilmo yar oo aan jinni iyo insi kala garaneyn oo wuu iska ciyaari jiray, ciddii ciyaarsiiso ayuu u qoslaa canugga yar, Soomaalidana waxaa ay dhahaa malaa'iigta ayaa ka qosolsiisay, marka walaashey waa qof Muslimad ah oo in ay ciyaarsiisa mooyee aan ugu imaaneyn in ay dhibaateyso canugaas yar ee sebiga ah. Markii uu wiilka garaadsi billaabay waa ay ka joojisay in ay is tusto, waayo maskaxdiisa ma xamili karto in ay xafiddo muuqaalkeeda.*

*Su'aal: Gartay, waxaad mar iga ballan qaaday in aad iiga sheekeyn doontid gabdhaha Soomaaliyeed ee dhaha wiil jinni ah ayaa iga kor hadlay, bal hadda fursaddaas ma heleysaa si aad iigu taabato?*

*Reymaa: Maya, taas wareysiga kale inooga dhig, waayo aniga ayaa muursaaqsan hadda, si baan u muursaaqsanahay.*

*Su'aal: Muursaaqsan maxaad ula jeedda?*

*Reymaa: Raalli noqo, waan bir tolanahay ayaan ula jeedda?*

*Su'aal: Weli kuma fahmin, waan bir tolanahay maxaad ula jeeddaa?*
*Reymaa: Soonaalida shan faroodlaha ah waxaa ay dhahaa "Geeleygii baa cirka lagu maalayaa" sidaas camal o oaf jinni ah waaye, markii xaaladdu si kaa tahay oo qof kale wax kaa qasooyo ayaan dhahnaa waan muursaaqsanahay ama waan bir tolanahay.*

*Su'aal: Hadda maxaa lagaa halleeyey ama lagaa bi'iyey?*
*Reymaa: Nin yahow ninkii baas soo uma jeedid, kii aan jeclaa baa naagtiisii min yarada la jooga qolka jiifka, ma wayna isku sar go'an yihiin oo waxaad mooddaa gacnihiisa in ay jirkeeda ku sameynayaan kormeer hawleed heer qaran ah, min tin illaa cirib buu gacanta mariyey iyaduna hamuun darteed miyir beel bey isku rideysaa, dey afkeeda, bal day sidey tiraahdo, turufo-toorad, kan qalbiga inta ka dheg qaadday ayey guntiisa ka degtay, sida aan kaga soo saari doono ma ogi.*

*Su'aal: Reymaa raalli noqo, jirkaagii oo dhan baa jareeyey, indhahaagiina qaac cad baa ka baxaya, aniga waan baqay, waxa aad ka sheekeyneyso uma jeedi, bal is deji aan wareysiga qeybtan uun dhameynee, waa iga codsi.*

*Reymaa: In yar ii kaadi, halkan ii fadhi Abukar Albadriyow, waa in aan badda gunteeda ku soo guux-haftaa, haddii kale waa is gubaayaa.*

*Su'aal: Reymaa, halkeed aaday, war ku aaway, kuuma jeedo? Mmmmhhh... Abidkey tan oo kale?*

*Reymaa: Waa i kan, raalli noqo 10kii daqiiqo ee aan kaa maqnaa, badda Ruushka ayaan tagay si aan barafka badweyntaas isugu soo guux-hafiyo, waayo waan guban lahaa haddii kale. Naagtan sidan iiga maseyrsiisay waan iska dhicin lahaa, ee marna ma gefto in ay Acuudu billeysato, iyo in ay Alxamdu Lillaah tiraahdo marka ay hawsha odeygeeda ka bogato, isagu waa neef caadi ah, bisinka uun buu mararka qaar haleelaa mooyee uma*

*adkaar badna sida naagtan baas, naagaha kale xitaa waxaa ay kaga kasbatay waxaa ugu badan adkaartan, waayo waligey ma arag iyada oo inta bisinka hilmaanta uu sheydaanka wasaqdiisa ureysa uu korkeeda ku shubayo, waa naag caqli badan.*
*Su'aal: Gabdhaha insiga ah waxaa ku dhaca dhiig loo yaqaano caado, idinka ma idinku dhacaa jinni ahaan?*
*Reymaa: Anaga gabdhaheena jinniga dhiigga caadada bedelkiisa waxaa nagu dhaca haduufaan, haduufaanku waa dheecaan sanka ka yimaado oo ur badan, kaas oo gabadha jinniga ah u diidaya in uu nin u dhowaan karo inta uu haduufaanka hayo, balse marka aan muuqaalka insiga isu soo ekeysiiyo xitaa haddii uu haduufaan i haayo la igama garan karo, waayo muuqaalkeygii iyo dheeheygiiba waa bedelmayaan.*

*Su'aal: Gabdhaha jinniga ah imisa ayey uurka sidaan marka ay uureystaan?*

*Reymaa: waxay ku xiran tahay nooca jinniga, qabiilkeyga Si'lat waxaa ay hooyada uurka leh siddaa 12 bilood kaddibna 30 ilmo ayey dhaleysaa, balse qaar waxaa jira bishiiba 1000 ilmo dhalo sida shayaadiinta.*

*Su'aal: Soomaalidu waxay leeyihiin maahmaahyo jinniga ku saabsan, tusaale waxay dhahaan "Jinniba miirkiisa wuu qabaa" "Jinni ninkii keena ayaa bixiya" iyo "Jinni ka carar mooyee u kaadsi ma leh" idinka maxaad dhahdaan?*

*Reymaa: Waxaan dhahnaa "Shan faroodle sheekadiis faan waaye" waxaa kale oo aan dhahnaa "Dhoocil insi dhubuq dhubuqdeeda ayaa dharbaaxo jinni u keenta" waxaa kale oon dhahnaa "Jaceyl insi kaa galay iyo jid cirka lagu beegay midna lagama guul gaaro"*

*Su'aal: Dalka Soomaaliya wuxuu ka kooban yahay 18 gobal, haddana maamul gobaleedyo ayaa ka jira oo Federaal ayaa laga dhigay, jinniga isagana ma isla sidaas buu 18 gobal u leeyahay mise waad ka duwan tihiin insiga Soomaaliyeed haddii aad tihiin jinniga Soomaaliyeed?*

*Reymaa: Goballo ahaan anaga waan ka duwan nahay, waayo anagga*

Abdulkadir Uukow

Soomaali Weyn ayaa inoo dhisan haddii aan jinniga Soomaaliyeed nahay, Kenya iyo Itoobiya Insiga uun bey dhulka ka heystaan mooyee jinni ahaan Gaarisa iyo Godey magaalada Suufaadiin ayaa laga xukumaa, gobalada Soomaaliyeed ee jinnigu waa 27 gobal.
Su'aal: Suufaadiin maxaad ula jeeddaa?

Reymaa: Hahahaha… in aad jinni tahay ayaan kuu maleynaayey Abuukarow, Suufaadiin waa Magaca Muqdisho ay jinniga u yaqaanaan.
Su'aal: Gobalada Soomaaliyeed ee jinniga magacyadooda ma ii sheegi kartaa?
Reymaa: Suufaadiin (Banaadir), Leymuudiin (Shabeelada Hoose), Samuudiin (Shabeelada Dhexe), Barkadlediin (Baay), Keerlediin (Bakool), Samuurdiin (Gedo), Dharaasdiin (Jubada Dhexe), Biyodiin (Jubada Hoose), Raasdiin (Hiiraan), Taqiyudiin (Galgaduud), Reyxaanudiin (Mudug), Maasdiin (Nugaal), Raasamiinudiin (Bari), Laasudiin (Sool), Teeludiin (Sanaag), Wannudiin (Togdheer), Naasudiin (W. Galbeed), Awlediin (Awdal), Suunbuuli (Qoraxay), Shaahshaah (Shabelle), Kaamilnuun (Godey), Xadiisuuni (Baali) Ganaane (Doolow), Saan-rasuul (Mandheera), Kaamuunsan (Gaarisa), Baaxuuriin (Wajeer), Liifeeliin (Tana River), waa 27kan gobal Soomaaliya
.Su'aal: Soomaaliyada insiga waxaa Madaxweyne ka ah Md. Maxamed Cabdullaahi Farmaajo, Waxaa Ra'iisal Baarlamaan ka ah Md. Maxamed Sheekh Cismaan Jawaari, waxaa Ra'iisal wasaare ka ah Md. Xasan Kheyre ee jinniga ma nadaamkaas uun buu leeyahay oo madaxdaas ayaa madax u ah, mise maamul u gaar ah ayuu leeyahay jinniga Soomaaliyeed?

Reymaa: Tani waah awl dheer, anaga Madaxweyne iyo Ra'iisal Wasaare iyo Baarlamaanka aad sheegeyso ma qabno, sheekadan halkan igaaga jooji, wareysiga qeybtiisa kale ee Axadda inooga dhig, waad I daalisaye, indhaha isku qabo si aan kaaga tago (Nabadeey….)…

***Fadlan ….. La soco qeybta 4aad***

Abdulkadir Jukow

# *WAREYSIGII: GABADHII JINNIGA AHEYD EE REYMAA, QEYBTII 4-AAD*

*Dib U Habayntii**Abdulkadir Uukow***

*– Wareysiga qeybtiisa seddaxaad waxaa uu inoo marayey aniga oo Reymaa weydiinay su'aal la xiriirtay nooca maamul dowladeed ee ay leeyihiin jinniga Soomaaliyeed, wareysiga qeybtiisa 4aad waxaan ku billaabeynaa isla su'aashii ugu danbeysay iyo jawaabteeda, waana sidan.*

*Su'aal: Soomaaliyada insiga ah waxaa ay leeyihiin Madaxweyne, Ra'iisal Baarlamaan iyo Ra'iisal wasaare, Soomaalida inniga ah ma nadaamkaas uun bey leeyihiin mise hab maamul kaas ka duwan?*

*Reymaa: Bulshada jinniga ah ee dalkan waxaa ay leedahay Mandaluul, Jundaluul iyo Maasdaluul. Waana hab ku dhisan seddax awoodood oo kala sarsareysa, midda koowaad ee Mandaluulka waa Golaha sare ee laga maamulo dalka, waxaana Mandaluulka ugu sarreeya Al-Sayid Hirqiyaa oo talada hayey kunkii sano ee la soo dhaafay. Junduluul oo ah awoodda ciidan ee jinniga Soomaaliyeed waxaa aasaasay Janaraal Shuu Shu 1500 sano ka hor, haatan xilli dhow oo 200 sano ka hor ah waxaa loo dhiibay Janaraal Shaamiluun, waana awoodda ciidanka jinniga ee Afrika ugu xoog badan.*

*Golaha Maasdaluul waxaa ay ka kooban yihiin xubnaha maamulka min heer Wasiir illaa guddoomiye degmo, dhammaantoodna waxaa ay ka kooban yihiin 11 Dhuuqe, 27 Jiite, 271 Rife.*

*Su'aal: Dhuuqe, Jiite iyo Rife maxaad ka waddaa?*

Abdulkadir Uukow

*Reymaa: Hahahahaha… Dhuuqe idinka waxaad dhahdaan Wasiir, Jiite waa guddoomiye yaasha gobalada 27-ka ah ee dalka, rifayaashana waa guddoomiyeyaasha degmooyinka, waxaa jira kuwo la dhaho leefayaasha, kuwaas oo idinka u taqaanaan agaasimeyaal ama maareeyayaal,*

*Su'aal: Jinnigu ma leeyahay dagaal oogayaal, mooryaan iyo ganacsato hubeysan?*

*Reymaa: Khiiiiiiiiiiiiiiiiiiiiiiiiiiiiiikh! Mandaluulka iyo Jandaluulka way riiqayaan wixii edeb darro lagu arko, jundiga SunSaaq ee dalka ugu awood badan xaruntooda waxaa ay ku taallaa gobalka Ganaane, ciddii edeb darsata waxaa ay geynayaan xabsiga JamalJaan, dagaal oogena ma jiro, jinni isuma dilo sida shanfaroodlaha, xitaa ciidanka koofiyadleyda qori looma ogola.*

*Su'aal: Ciidanka koofiyadleyda waa kuwee?*

*Reymaa: Hahaha… idinka Booliis aad dhahdaan, anaga koofiyadley aan dhahnaa, hubkooda dhan waa koofiyado, naasquud ayey nagu waaleen.*

*Su'aal: Naasquud maxaad ka waddaa?*

*Reymaa: Shaxaad maad dhahdaan, haa waa shaxaad.*

AbdulkadirUjukow

*Su'aal: Reymaa aniga ayaad I waali rabtaa, su'aasha ugu danbeysa ee dhanka siyaasadda haddii aan ku weydiiyo, waxaad ii sheegtaa magaca guddoomiyaha gobalka Banaadir ee Jinniga Soomaaliyeed?*

*Reymaa: Dhuuqaha Gobalka Suufaadiin waxaa la yiraahdaa Jamaaludiin, waa nin khibrad badan oo waayeel ah, 2500 sano ayuu jiraa, 700 oo sanadood ayuu Suufaadiin Dhuuqe ka ahaa,. Markii uu talada qabaneyey magaalada Suufaadiin waxaa ay ku ekeyd inta u dhexeysa tuulada Daguuni oo idinka u taqaanaan Qalimow, iyo deegaanka Firdows loo yaqaano Gendershe.*

*Haatan Suufaadiin dhinaceeda koofureed waxaa ay gaareysaa deegaanka Ruusaatiin ee aad u taqaanaan Dhaay Tubaako, taas oo ah Baraawe gadaasheed, dhinaca waqooyina wuxuu gobalka Suufaadiin ku eg yahay Buulo-diin oo aad u taqaanaan Warsheekh.*

*Su'aal: Suufaadiin ma leedahay garoon diyaaradeed calami ah oo ay diyaaradaha ka duulaan, mise waxaad isticmaashaan kan Aadan Cadde?*

*Reymaa: Haa, garoonka caalamiga ah ee Suufaadiin wuxuu ku yaallaa xaafadda Masagoole ee u dhaw madaxtooyada Mandaluulka.*

*Su'aal: Waa halkee xaafadda Masagoole?*

*Reymaa: Waa Meesha aad u taqaanaan buulo fulay ee u dhexeysa Qoryooley iyo Buurhakaba.*

Abdulkadir Uukow

*Su'aal: Magaalada Suufaadiin ee anaga aan u naqaano Muqdisho ama Banaadir insi ahaan waxaa dadka deggan lagu qiyaasaa 2 illaa 3 milyan, bal dhankiina Suufaadiin imisa jinni ah ayaa deggan?*

*Reymaa: Guud ahaan dalka Soomaaliya jinniga ku nool waa 700 oo milyan, 240 milyan oo ka mid ah waxaa ay deggan yihiin Suufaadiin.*

*Su'aal: Haddii aan dhanka siyaasadda ka weecano, sideed u aragtaa in aad iiga sheekeyso sida uu jaceylka insiga u saameeyo jinniga iyo arrin insiga dhexdiisa caan ka ah oo ah in gabdhaha uu mar walba ka kor qayliyo wiil jinni ah.*

*Reymaa: Inta badan Gabadhana jinniga ah waxaa y jecel yihiin wiilasha insiga ah, siyaabo badan ayeyna ula dhaqmaan. Waa ay dhacdaa in gabar jinni ah oo aan muslim aheyn ay wiil insi ah noloshiisa la wadaagto, iyada oo aan u bandhigan. Inta badan dadka aan salaadaha dukan, kuwa aan Ilaah ku xirneyn ayey gabdhahaas jinniga ah daneeyaan oo ka qaraantaan.*

*Tan ugu daran waxaa ay tahay, gabdhaha jinniga ah ee Muslimka ah, ee aan dooneyn in ay qof insi ah khiyaameeyaan, kuwaas ayaa dhibaato badan kala kulma dhinaca xiriirka jaceyl ee ay la sameyn lahaayeen ragga shanfaroodlaha ah.*

*Tan ah gabdhaha laga dulqayliyo, waa sheeko, gabdhana Soomaalida ee shanfaroodlaha ah wiilkii ay ka helaan ayey dhahaan wuu iga dulqayliyey, waah ab xariifnimo ah oo ay ku sheegtaan in ay wiil jecel yihiin, weliba kuwa qooq billowga ah ayaa ugu badan.*

*Haddii qof laga kor qeylin karo maan aniga ka kor qeyliyo kan 30 sanadood aan jaceylkiisa dartiis u silcayo ee igu qasbay in aan Liido dego si aan gurigiisa ugu ag dhowaado, waxaas ma jiraan.*

Abdulkadir Uurow

*Su'aal: Mahadsanid! Midda kale waxaad hadda ka hor iiga sheekeysay dhibaato jaceyl ee ku dhacday gabar saaxiibtaa ah oo lagu magacaabo Nujuum Ruuxaani, taas oo wiil ay jecleyd oo insi ah u dirtay dhanbaal jaceyl oo aad u yaab badan,bal arrintaas iiga skeekey haddii aadan waxba ka qabin.*

*Reymaa: Huuuuuuuuuuuuuh! Khiiiiiiiiiiiiiiiiiiiiiiiiiiiiiiiiiiiiiiiiiikh Kharabtun Kharabaanun khusss Khussssa.*

*Su'aal: Waan ka xumahay Reymaa, Please! Uguma talo galin in aan kaa xanaajiyo, Reymaa Please!*

*Reymaa: Aaaaaaaaaaah! Ma kugu xanaaqin aniga, balse waxaan ku dhowaaday in aan dawaqo. Saaxiibtey Nujuum Ruuxaani weli moowjadaha dushooda ayey ligan tahay, waxaan ula jeedaa Koomo ayey ku jirtaa ama way suuxsan tahay, maalintii wiilkii ay jecleyd ee shanfaroodlaha ahaa uu qaraxa ku dhintay ayey koomo gashay waaye.*

*Su'aal: Hadda ka hor waxaad ii sheegtay in dhanbaal aad u cajiib ah ay Nujuum u qortay wiilkaas ay jecleyd ee Alshabaab ku dhintay, dhanbaalkaas ma inoo aqrin kartaa?*

*Reymaa: Dhanbaalkaas wuxuu ahaa mid aad uga tarjumayey dareenka saaxiitey, haddii uu insi dareen leeyahayna runta way ugu sheegtay. Wiilka ay jecleyd wuxuu ahaa wiil dhalinyaro ah, qurux badan, mar dhaw jaamacad dhameeyey, weli aan guursan, shaqo dowladda ka helay, oo ay ku*

Abdulkadir Uukow

*hanweyneyd in ay kasbato inta uusan guursan gabar Shanfaroodle ah, wax yaabo badan ayey sameysay si ay kalsoonidiisa u kasbato, dhanbaallo badan ayey u dirtay, balse midkii ugu horreeyey ayaa ugu cajiibsanaa.*

*Su'aal: Inta aadan ii aqrin dhanbaalka waxa ku qornaa wax iiga sheeg wax yaabaha ay sameysay si ay isaga ugu kasbato?*

*Reymaa: Saaxiibtey waa ay is tusi jirtay wiilka, bishiiba dhawr habeen ayey riyo inta ugu timaado waqti kula qaadan jirtay, waqti waxaan ula jeedaa caadi ah, isagana riyo caadi ah ahaan uun buu arrintaas u qadarin jiray arrintaas, waxaase yaab ku reebi jirtay inuu mar walba riyada ku arki jiray hal gabar oo kaliya, taas oo uusan soojeed weligiis muuqaalkeeda ku arkin.*

*Asxaabtiisa ayuu uga sheekeyn jiray in habeen walba uu gabar aad u qurux badan riyada ku arko soojeedse uusan weli kula kulmin, iyadana marka uu ka sheekeynayo riyooyinkaas cajiibka waa ay iska dhegeysan jirtay, mararka qaar aniga xitaa Nujuum waan isa soo raaci jirnay si aan u dhegeysano marka uu saaxiibaddiis uga sheekeynayo riyadii xalay, waana ku raaxeysan jirnay.*

*Saaxiibtey wax yaabaha ay sameyn jirtay waxaa ka mid ahaa in ay geed guriga ku yaal ku soo degi jirtay iyada oo isu soo ekeysiisay shinbir, isagana shinbiraha wuu jeclaa, sidoo kale waxaa jirtay bisad gurigooda joogtay oo uu jeclaa, saaxiibtey inta bisada banaanka ku mashquuliso ayey isu ekeysiin jirtay bisaddii uu jeclaa, markaas ayey isaga oo fadhiya lugihiisa hoostooda marmari jirtay, jirkiisana isku xoqi jirtay, isagana dhabarka iyo qoorta ayuu u salaaxayey isaga oo mooda inuu bisaddii guriga joogtay ay tahay, taasi waxaa ay aheyd sida kaliya ee ay waqtiga tooska ah kula qaadato saaxiibtey.*

*Dhibaatada xanuunka leh ee dhacday waxaa ay tahay, markii uu wiilkii billaabey inuu gareysto in ay noloshiisa qeyb ka tahay gabar jinni ah, weliba*

Abdulkadir Ujlow

*uu billaabay inuu soo yara dabco oo aamino, uuna ka dhursugayey in uu kulmo gabadhan riyada uu ku bartay ayuu wiilkii qarax ku dhintay. Saaxiibtey waxaa ay dooneysay in aysan qalbigiisa dhaawicin oo sida aniga iyo adiga hadda isu arkeyno cabsi la'aan heerkaas in ay isla gaaraan, markaas ayey dooneysay in ay billowdo in ay toos noloshiisa uga mid noqoto.*

*Nasiib darro, noloshaas quruxda badan ee ifafaalaheeda sida quruxda badan u soo muuqanayey waxaa cimrigeeda soo gaabiyey Alshabaab oo aan cidna nolol u ogoleyn.*
*Su'aal: Adiga uu mahadsan hadda ma ii aqrin kartaa dhanbaalkii 1aad ee ay Nujuum u dirtay Axmed inta uusan dhiman?*

*Reymaa: Haa! Dhanbaalka waxaa ay cinwaan uga dhigtay sidan:*

*RAXMAD, HIMAD & JACEYL!*

*"Kani waa dhanbaal kaaga yaabsan doona si walba, waayo waxaa aad ka heshay qolkaa dhexdiisa uun, mana ogid cidda kuu soo diray. In kastoo aadan aqoon haddana waxaa kuu soo diray qalbi uu wadnihiisa ka sameysan yahay luulka badweynta, dhiigiisa uu yahay malabka shinida, dheeha iyo cadkiisuna ay yihiin xariir janaad, qalbigaas oo ay buux dhaafiyeen Raxmad, himad iyo Jaceyl adiga uun kugu sabri kara.*

*Durba maskaxdaada waxaa ay billowday hawl ah in aad is weydiiso "Tolow yaa dhanbaalkan kuu soo diray", waxa aadna gedgeddineysaa warqadda adiga oo raadinaya magaca qofta soo dirtay.*

*Waan ka xumahay in aan sidaas kuu mashquuliyo, waxaan aad uga jeclaan lahaa in aad magaceyga durba ka aragto billowga dhanbaalka, kuna*

Abdulkadir Uukow

*faraxdo, balse haatan magaceyga kuma qorna dhanbaalkan, sidaas darteedna waxaan kaa codsan lahaa in aad farriinta aqriso si aad u fahamto, magaca gadaal danbe ayaad ka ogaan doontaa.*

*Qofta dhanbaalka kuu soo dirtay waa qof farxaddaada aad u jecel, waa qof ku himiloota in ay farxaddaas dhalinteeda qeyb weyn ku yeelato, waa qof marka aad socoto laafyahaaga daawata si ay niyadda ugu dejiso, waa qof marka aad fadhiisato sheedda kaa qooraansata si ay kaaga ilbuuxsato, waa qof marka aad jiifto ku dul timaadda si kuu wehliso.*

*Neecaw kalgacal oo aad u macaan ayaan kugu seyriyaa marar badan, saxansaxo ka soo gufaaceysa qalbigeyga waaxyihiisa ayaan kugu harqiyaa, dhididka waxaan kaaga masaxda cad aan ka soo jaray bartamaha wadnaheyga, marka aad hurdada ku daasho oo aad is yara geddineyso waxaan kaa caawiyaa gaddoomidda, marka aad hamaansato adiga oo hurda masar aad u udgoon ayaa afka kuugu aadiyaa si aan kaaga ilaaliya saxarka.*

*Marka aad dhex gasho badweynta hurdada, inta aan barkintaada agteeda soo fadhiisto ayaan mar ku daawadaa, mar ku afuufaa si aan kuu qaboojiyo, mar waan ku yara salaaxaa si uu jirkaaga u dareemo nafis iyo raaxo, mararka qaarna waxaan kuu shidaa music aad u deggan iyo hees oo dabacsan oo macaan, intaas kaddibna waxaan isku hawlaa sidii aad dhex gali laheyd riyo macaanteeda, quruxdeeda ilqabowsigeeda adiga mooyee uusan qof kale ka sheekeyn karin.*

*Taas waxaa ii dheer, marka aad hurdada ka soo kacdo oo aad dooneyso in aad sariirta ka degto waxaan seexdaa dhulka meesha aad lugaha dhigeyso si aan kaaga ilaaliyo adeyga marmarka (mutuneelka) dhulka, marka aad*

Abdulkadir Uukow

*sariirka ka degeyso dhabarkeyga ayaad ku istaagtaa, waa sababtaas darteed sababta aad lugaha uga dareento raaxada tirade badan.*

*Xusuusnow mar walba oo ay xaaddaadu istaagto in ay qof ku jeceli agtaada taagan tahay oo neecaaw qabowna ay kugu afuufeysa. Mararka qaar aniga oo is leh leyr qabow uun ku yara afuuf ayey faruuryaheygu si kama' ah ay u taabtaan wejigaaga, markaas ayey xaaddaadu wada istaagtaa, waan naxaa oo waxaan is iraahdaa armuu toosaa, hadda waan faexaa waayo anigana xaadeydu waa ay is taagtaa.*

*Hawl aan qabto waxaan ugu jeclahay taabashada garbahaaga adiga oo aan i ogeyn, lagaba yaabee in aadan ii ogolaan laheyn in aan korkaaga taabto haddii aad i ogaan laheyd, waayo wax xiriir ah oo toos ah inagama dhexeeyaan, balse waxaan dareemaa in faraheyga iyo qalbigaaga uu xiriir wanaagsan ka dhexeeyo. Taas waxaa caddeyn u ah markii ay faraheyga taabtaan jirkaaga durba qalbigaaga jawaabtiisa ayaan ka arkaa jirkaaga dushiisa.*

*Inta oo hadal ah waxaan kuugu qoray in aan kuu caddeeyo in aan ahay naf si dhab ah kuu jecel. Waxaan u hilow qabaa la joogistaada, waxaan u hammuun qabaa taabashada jirkaaga, hadde waa taabashada jirkaaga, hadde waa jirka oo idil. Faraheyga, hadde waa faraha oo idil e, waxaa ay ku han weyn yihiin in ay kormeer hawleed ku soo maraan dhammaan oogadaada, min tin illaa cirib, bog iyo dhabar, illaa baaca hoose loo dhaadhaco.*

*Ma ogi sida aan Eebe weyne ugu mahadnaqi lahaa haddii aan arki lahaa bushimaheyga oo dhunkana meel walba oo jirkaaga ka mid ah, sankeyga oo hadba tartiib ugu sii siqaya meermeertooyinka jirkaaga ee uduga badan.*

Abdulkadir Ulukow

*Intan oo dhan waxaan doonayaa in ay dhacaan adiga oo igu faraxsan, adiga oo ii dhoolacadeynaya, adiga oo inta aad gacanteyda qabatid, ii soo dhowaatid, hab i siisid kaddibna igu qabatid laabtaada, illaa aan ka dareemo in labadeena jir ay isugu dhegayaa sida labada fidqe ee shaatiga marka la feereynayo.*

*Diirrimaadka aad dareemi lahaa marka aad laabtaada igu qabato waxaa ka dhalan lahaa tamar ay iftiinkeeda shidan karaan dhammaan mucaashaqiinta, si ay habeenka mugdiga ah u helaan fursad ay ku aqristaan dhanbaallada jaceylkooda.*

*Daqiiqad walba waxaa ay iila mid tahay maalin, maalintuna waxaa ay iiga dhigan tahay sanad, mar walbana waxaan ku rajo weyn ahay in aad dhankeyga soo qooraansan doontid oo aad qalbigaaga iga siin doontid boos aan kaga noolaado, xitaa haddii booskaasi yahay mid la eg taako dhererkeed.*

*Riyadeyda waxaa ay dhab u rumoobi laheyd haddii aan arki lahaa mar qura aniga oo hoostaada dhabacaada adiguna aad indho raxmad leh igu eegeysid, gacantaada midig ah dhabarkeyga hoos ka soo heyso, bidixdaadana ay horaadkeyga saran tahay, bushimahaaga ay gaaf wareegayaan qoorteyda, sankaaga caaraddiisa ay si hal haleel iigu afuufeyso saxansaxo janaad.*

*Ugu danbeyntii, ha is mashquulin, hana is weydiin sida aad iigu soo jawaabi laheyd. Haddii aad jawaab isiineyso waxaad raacdaa habkan. Habeenka ugu horreeya ee aad riyada ku aragto gabar xiran dhar waxa jaalle ah oo ku sawiran yahay wadne guduudan, lanbarka ku qoran cillaanka gabadhaas aad riyada ku arki doonto gabadha gacanteeda uun ku qor derbiga*

*musqusha, qofna ha u sheegin sababta aad lanbarkaas Meesha ugu qortay.*

*Waxaan kuugu soo gebagebeynayaa Farxad iyo jaceyl, aniga oo aad kuugu himad qaba."*

*Abuukarow dhanbaalkii 1aad ee saaxiibtey Nujuum halkaas ayuu ku eg yahay.*

*Su'aal: Horta aad ayaad u mahadsan tahay, runtiina dhanbaalkan wuxuu i galiyey qushuuc, wiilkii muxuu sameeyey, miyuu u soo jawaabay saaxiibtaa?*

*Reymaa: Eeen! ………..…*

*……. **Fadlan …Jawaabta… kala soco qeybta 5aad wareysigan.***

## *WAREYSIGII: GABADHII JINNIGA AHEYD EE REYMAA, QEYBTII 5-AAD*

*Dib U Habeyntii**Abdulkadir Uukow***

*Muqdisho – Wareysiga qeybtiisa afaraad waxaa uu inoo marayey aniga oo Reymaa weydiiyay su'aal la xiriirtay jawaabta uu bixiyey Wiilkii Soomaaliyeed ee ay jeclaatay Reymaa Saaxiibteed Nujuum, wareysiga qeybtiisa 5aad waxaan ku billaabeynaa isla su'aashii ugu danbeysay iyo jawaabteeda, waana sidan.*



Abdulkadir Uukow

Su'aal: Dhanbaalkan saaxiibtaa Nujuum ay u dirtay Axmed inta uusan geeriyoon ka hor waxaa uu ina galiyey qushuuc badan, wiilkii Axmed ahaa muxuu ku jawaabay, saameyn noocee ah ayuuse dhanbaalkii Nujuum noloshiisa ku yeeshay, maadaama ay caddahay in uu dhanbaalka uga yimid gabar aan insi aheyn?

Reymaa: Eeen! Axmed Ilaahey ha u naxariisto, hadda wuu dhintay, duco ayuu inooga baahan yahay! Saaxiibtey Nujuumna Ilaah ha caafiyo, naxdintii ay geeridiisa ka naxday darteed ayey weli koomo ugu jirtaa. Dhabtii Axmed aad ayuu uga falceliyey dhanbaalkii ay u dirtay saaxiibtey, naxdin ayuu ka qaaday, farxad kuma uusan soo dhoweyn dhanbaalka.

Markii uu dhanbaalka aqriyeyba wuu is waalay, dharka ayuu tuuri gaaray, balse Quraan ayuu gurigii ku aqriyey, culumo ayuu isu keenay, waa la i sixray ayuu yiri, wuxuu u qaatay in la sixray oo jinni loo adeegsaday, balse lama sixrin, jinnina looma adeegsan, isaga uun baa iska dhaadhiciyey, jinniga waa gabar si dhab ah uga heshay.

Su'aal: Iyadu waa jinni, isagana waa insi, marka ay ka heleysay halkuu joogay, sideyse ku aragtay?

Reymaa: Axmed wuxuu ka mid ahaa dhalinyarada Shiishadda cabta, inta ugu badan goobaha shiishadda lagu dhuuqo jinni wuu joogaa, waliba jiniyada ugu halista badan ayaa joogaan, waayo jinniga tubaakada aad ayuu u jecel yahay, kiisa xun iyo kiisa fiicanna inta badan way cabbaan shiishadda.

Axmed shiishadda uu cabbo, marka uu qaaca sii daayo ayey korkiisa ma dhuuqi jirtay saaxiibtey, kaddibna haaneedkiisa iyo suurihiisa ayey ka

Abdulkadir Jukow

*heshay, dartiisa ayey meeshii shiishadda u tagi jirtay.*

*Axmed shiiashadii ayuu ku xanuunsaday, waayo shiishaddu waa tubaako aad u culus oo sanbabada aad u dhaawacday, wuxuu ka qaaday cudurka TB, kaddibna waa laga daweeyey, shiishaddiina wuu iska dhaafay, saaxiibteyna sidii ayey gurigiisa ugu soo raacday.*

*Su'aal: Axmed falcelintiisii iyo quraankii sidey u saameeyeen Nujuum?*

*Reymaa: Nasiib darrada dhacday waxay aheyd in saaxiibtey gurigii laga xijaabay oo Quraan lagaga saaray, muddo dheer ayuu guriga Quraan ku waday oo saaxiibtey laga xijaabay, qolkii uu degganaa ee ay warqadda u dhex dhigtay xitaa wuu ka guuray, jimco walba gurigii Quraan baa lagu aqriyaa oo raatib ayuu ka dhigtay, marka uu guriga ka baxayo qolkiisa quraan ayuu ku shidaa oo kaga tagaa, gaarigiisa heesihii wuu ka joojiyey oo Quraan ayuu ka shitaa, meelihii uu shiishadda ku cabbi jiray wuu ka go'ay.*

*Mararka qaar heer wuxuu gaaray haddii uu si caadi ah u jiriricoodo in uu moodo in ay Nujuum afuufeyso, markaas ayuu qayliyaa, "Acuudu Billaah" ayuu yiraahdaa, dadkii oo dhan baa la yaabeen, wiilkii wax waashay camal buu u dhaqmayey. Quraan aqris ayaa lagu waday muddo dhawr bilood ah.*

*Saaxiibtey dhanbaalkii naxariista badnaa ee ay u dirtay Axmed waxaa ay ka dhaxashay in ay agariisa weyso in muddo ah, wiilkii ay jecleyd iyo iyadiina shanfaroodle ayaa kala irdheeyey, waayo haddii xitaa uu u naxariisan lahaa iyagii baa Quraan iyo dhaawid la daba kacay oo wiilkii ku leh wuu waashay, isagiina wuxuu aaminay in la sixray.*

*Ugu danbeyn xaaladiisa waa ay soo roonaatay, xitaa waxaa jirtay rajo ah in uu Nujuum jeclaan doono, saansaan wanaagsan ayaana ka muuqday inta uusan qaraxa ku dhiman.*



Abdulkadir Jukow

*Su'aal: Inta Quraansaarka iyo Dhaawidda lagu waday Axmed maxay sameyn jirtay saaxiibtaa, miyey ugu tagi jirtay gurigiisa, siduuse Quraanka u saameeyey iyada?*

*Reymaa: Maya! Uma aysan tagi karin, waayo quraanka la aqriyey wuxuu ahaa xijaab iyada laga aqristay, Quraankuna waa xijaab wixii laga aqristo kaa xijaaba, xitaa insiga ayuu insi kale ee dulminaya ka xijaabaa haddii uu si niyad ah oo daacad ah u aqristo, ALLAAH na baryada wuu aqbalaa, marka saaxiibtey meel ugama banaaneyn guri Quraanka lagu oowday ay gasho.*

*Su'aal: Saaxiibtaa markii Quraanka uu ka aqristay Axmed ma weysay mise weli way arki kartay?*

*Reymaa: Aragti way arki kartay, balse sidii ay markii hore ugu dhoweyd ee habeenkii dhan iskala joogi jirtay uguma aysan soo dhowaan karin, riyadiisa sidii au ugula haasaawi jirtay waa ay weysay. Mararka uu guriga ka soo baxo ee uu gaarigiisa meel inta dhigo, ka dego ayey sheedda ka daawan jirtay, fursaddaas ayey joogto u raadin jirtay, waayo waxay aheyd fursadda kaliya ee ay heysatay, waa xilliga kaliya ee uusan Quraan u daarneyn ama uusan aqrineyn ee uu xijaab la'aan yahay, mararka uu Quraanka afka ku heysto ma arki karin, wuu ka xijaabmayey.*

*Su'aal: Sida aad ii sheegtay galabtii aan gurigaaga joognay Axmed muddo kaddib wuxuu yareeyey Quraankii uu isaga xijaabayey Nujuum, kaddibna Nujuum waxaa ay dib u billowday in ay la xiriirto oo dhanbaallo hor leh u dirto, arrintaas wax iigasheeg?*

Abdulkadir Uukow

*Reymaa: Nujuum mar kale ayey heshay fursad ay Axmed ugu dhowaato. Axmed gurigii hore ayuu ka guuray, gabar ayuu la saaxiibay, gabadhaas ayaa ugu imaan jirtay guriga uu degganaa. Nujuum kama aysan xumeyn in uu saaxiibad yeeshay, waayo waxay aheyd xilliga kaliya ee ay fursad u heli jirtay in ay daawato isaga oo gabadha la sheekeysanaya, balse gabadhaas waxaa ay aheyd gabar suuro badan, xanaaq badan, maseyr badan, inta badanna iyada uun inta xaalad abuurto ayey waqtiga kaga qaadi jirtay, aad ayuu ugu dulqaadan jiray oo u maslaxeyn jiray, marka ay ka tagto ayuu fikir gali jiray, xilligaas uu fikiraayo ayey saaxiibtey Nujuum ka faa'iideysan jirtay oo inta u dhowaato ayey waxa uu ku fikirayo ayey u suureyn jirtay.*

*Markaas uu fikirka la tago ee uu ka fikirayo gabadhii uu jeclaa ee u timid, haddana ka tagtay isaga oo aan faraxsaneyn ayey Nujuum isaga gelin jirtay riyo maalmeed uu isaga u maleeyo khiyaali uu isaga abuurtay, balse ay iyada u abuureysay. Sidoo kale ayey ku soo laabatay in ay riyadiisa habeenkii ugu timaaddo, isagiina in uu riyadaas jecleysto ayuu billaabay, oo Quraankii marka uu seexanaayo uu shidan jiray xitaa wuu iska demin jiray markii danbe.*

*Su'aal: Dhanbaalka ay u dirtay ee kale maxay ku qortay?*

*Reymaa: Waxay uga sheekeysay sida ay u jeceshahay iyo sida uu qaladka uga aaminsan yahay, waxay u sheegtay in aysan noloshiisa ka hareyn waligeed ama ha aqbalo ama ha diidee iyo in ay diyaar u tahay in ay is arkaan iyada oo aan wax dhib ah u geysaneyn.*

*Su'aal: Dhanbaalkaas hadda ma wada aqrin karno oo waa uu dheer yahay, balse waxaa jirtay qeyb ay ugu sheegeyso in ay horey isu arkeen, qaabkey ugu sheegtay in ay is arkeen?*

*Reymaa: Saaxiibtey maalin maalmaha ka mid ah waxaa ay raacday Bajaaj, waxaa ayna dooneysay in ay isaga aragto, markii ay bajaajta kaga degtay meeshii uu gaarigiisa yaallay iyada oo gabar caadi ah u eg, ayuu aad u soo jalleecay, wuxuu u muujiyey xoogaa dhoolacaddeyn ah, iyadana way u dhoolacaddeysay iyada oo ka shiixeysa hoosna eegeysa, kaddibna gaarigiisa markii uu fuulay ayuu ku yiri maku sii dhoweeyaa, iyadana haa ayey ku tiri.*

*Su'aal: Halkeebuu ku dhoweeyey markaas?*

*Reymaa: Iyada waxaa ay u sheegtay xaafad tiisa xageeda ah, kaddibna inta ay gaariga la saarneyd ayuu magaceeda weydiiyey, waxaa ay u sheegtay magaceeda runta ah, kaddibna lanbarkeeda ayuu weydiiyey, kaddiba waxaa ay ku tiri magaalada waan ku cusbahay, lanbar weli ma qaadan, sidii ayuu kiisa ugu qoray, markii xaafaddiisa lagu dhowaaday ayey gaariga ka degtay, isaga oo aad u soo qooraansanaya ayuuna ka dhaqaaqay.*

*Su'aal: Markaas miyuu dareensanaa in ay gabar jinni ah tahay?*

*Reymaa: Maya, muu dareemin, quruxdeeda iyo lebiskeeda iyo hab dhiskeeda ayuu ka helay, waayo Nujuum waxaa ay leedahay qurux Mucjiso ah, isagana aad ayuu uga helay, balse markii uu gaariga dhaqaajiyey iyadana way iska qarisay, waayo markii horeba kaligiis ayaa arki karay oo dadka kale meysan arkeyn, inkastoo ay isaga la aheyd in ay dadka arkayaan gabadhan horey u saran.*

*Su'aal: Sidee bey dhanbaalkeeda ugu sheegtay arrintaas markii ay doonaysay in ay Axmed u sheegto?*

Reymaa: Waxaa ay ku tiri sida “Axmed neecaawow! Maalintii iigu farxadda badneyd waxaa ay aheyd markii aniga oo ka degay Bajaaj inta ku soo eegay aad iigu baaqday in aad horey ii sii qaddo oo aan horey kuu sii raacay. Fursadda iigu dhow ee aad igu aragtay ayey aheyd, in badan ayaad i qooraansatay, lanbarkeyga ayaad i weydiisay, waxaan kugu iri "Magaalada waan ku cusbahay oo lanbar ma lihi" nasiib darro isuma kaa sheegi karin, oo waxaan ka baqay in aad mar kale qalqal gasho oo aan haddana ku waayo”.

Axmed hadalkaas wuu yara gareystay oo farrintii labaad kama uusan qalqalin, magicii Nujuum ee markii ay gaariga la raacday ay u sheegtay ayeyna dhanbaalka ugu soo qortay oo wuu gareystay.

Su’aal: Kaddib muxuu sameeyey?

Reymaa: Wuxuu arrintii kala sheekeystay saaxiibadiisa, markii uu ka sheekeynaayey waan la joognay, runta ayuu ka sheegay oo weliba wuxuu lahaa haddii aysan igu darsoomeyn waaban iskala saaxiibi lahaa.

Su’aal: Geeraarka warqadda ku qornaa wax maka xasuusataa?

Reymaa: Haa, wuu dheeraa, warqaddii ma hayo hadda, balse 3 beyd ayaad ka xasuustaa, isaga oo billow iyo dhameystir leh waan ku siin doonnaa marka aan arrinta Nujuum buugga ka qoreyno, balse hadda beydadka aan xasuusto waxaa ka midahaa:

Abdulkadir Uukow

*Markaan barashada jaceylka,*
*Bidhaantaadii jalleecay,*
*Markaad beerkeyga qaadday,*
*Bartamaha wadnaha i jeexday,*
*Miyuu ba'a ii billowday?*

*Sidii baalaleyda duusha,*
*Naftan kor kaa bidhaansan,*
*U baahan caashaqaaga,*
*Haddey dhab kuugu baaqdo,*
*Baxnaano miyaad u quuri*

*Markaad bartankii habeenka,*
*Boggaaga sariirta saarto,*
*Naftan boholyowgu qaado,*
*ee aawgaa bisinbisoota*
*Miyaad buuxow daryeeli*

*Markaad baxsanoow salaaxdo,*
*Bisadda yar ee beydka joogta,*
*Jirkeeyga siduu u booyo,*
*buseylkiyo beer nugeylka,*

*Miyey weli kuu bidhaantay,*

*Intaas ayaan ka xasuustaa, sidii ay saaxiibtey u tirisayna isuguma toos toosna balse waa inta hadda xusuusteyda ku jirta.*

*Su'aal: Bal aan intaas kaga beyrno xasuustii Axmed ALLAAH ha u naxariistee iyo saaxiibtaa Nujuum, waxaad iiga warrantaa habka dhaqan dhaqaale ee Jinniga Soomaaliyeed, jinni ahaan noloshiina maxay ku tiirsan tahay?*

*Reymaa: Insiga ayaan la mid nahay badankeen, waxaan cunnaa waxa ay shanfaroodlaha cunaan, balse jinniga qaar baa dhaqanka dugaagta leh.*

*Su'aal: Jinku miyuu kalluumeystaa, xoolo ma dhaqdaa jinni, beero ma leeyahay, maxaa idin ah dhaqaalaha aasaasiga ah?*

*Reymaa: Jinniga xoolo wuu dhaqdaa, balse geela ma jecla, Jinniga xoolaha uu ugu jecel yahay ee uu dhaqdo waa digaaga. Ari waan leenanahay, eeyaha iyo bisadaha waa xoolaheena, kuweena gaalada ah way iska cunaan, balse kuweena Muslimka ah doofaarka ma cunnaan.*

*Su'aal: Waxaa la sheegaa in jinniga uu aad u jecel yahay hilibka digaagga, taas miyey jirtaa?*

*Reymaa: Haah! Tusaale haddii qof inta uu habeenkii hilib digaag cuno isaga*



Abdulkadir Uukow

*oo aan gacmaha saabuun isaga dhaqin jiifto marka uu hurdo waxaa u imaanaya jinni gacmaha ka leefleefaya, hilibka digaaga haddii aad cunto oo aad meel mugdi ah aad marto wax baa ku soo eryanaaya, waa jinni hilibkaas soo raacaya, marka hilibka digaaga waa cuntada uu jinniga ugu jecel yahay. Cuntada labaad ee aan ka helno waa kalluunka, waa sababta aan badankeena xeeb u deggan nayay.*

*Su'aal: Jinniga Soomaaliyeed miyuu is heyb soocaa sida ay dadka isu heyb soocaan?*

*Reymaa: Jinniga wuxuu isku heyb soocaa Muslim iyo Gaalo, wuxuu kaluu isku heyb soocaa qabiilada Sheydaanka ku xiran sida ay u kala xoog badan yihiin, balse jinni Soomaaliyeed ee Muslim ah ma heyb sooci karo jinni kale oo Muslim ah, daruuf kasto ha lahaadee.*

*Su'aal: Jinniga ma leeyahay Faqiir iyo Taajir?*

*Reymaa: Haah! Xaafadda la yiraahdo Suubya-galeen waa xaafadda isku raranta ah ee ay deggan yihiin jinka saboolka ah, qaarkood xitaa guri ma heystaan oo buushash ayey deggan yihiin, qaarkood wax ay cunaan ma heystaan oo daruuftooda waa mid aad u sareysa, qaarna waaba tuugsadaan.*

*Su'aal: Dadku waxay aaminsan yihiin jinka in ay awood leeyihiin oo wax walba ogaan karaan, in ay lacago iyo dahab insiga siin karaan, arrintaas ma jirtaa?*

*Reymaa: Waxna way ka jiraan waxna waa been, wax waa ka jiraan oo jinnigu wuxuu ogaan karaa wax aan insiga ogaan karin, balse qofna xoolo ma siin karo, hadda haddii aan doono in aan hantideyda qeyb kaa siiyo sida kaliya ee aad kaga faa'iideysan karto waa in aad soo gasho nolosha jinniga, haddii aad dunidaada insiga gasho xoolohii waxay kaaga haraayaan noloshii jinniga, balse xoolo inta uu jinni insi siiyo uu insiga heysan karo ma jiraan, sida kaliya ee ay ku jiri karaan waa inuu qofkaas waalan yahay oo qashinada ku nool yahay, noloshaasna uu isaga u arko nolol qurux badan, halka ay dadka u arkaan mid qurun badan.*

*Su'aal: Jinniga hilibka digaagga dadka ku raaco ma jirtaa meelo uu ku badan yahay oo la iska ilaalin karo?*

*Reymaa: Haah!, meelaha qubuuraha ku yaallaan, haddii agagaarahaaga qubuuro ku yaallaan adiga oo hilib digaag cunay oo aan saabuun ku dhaqin ha aadin. Haddii aad hilib digaag cunto iska jir in aad aaddo meel qabuuro u dhaw yihiin ama aad habeen meel mugdi ah lugeyso.*

*Su'aal: Dadka marka ay Xeebta Liido tagaan horey u qaato (Chicken and Chepsi) oo hilib digaag duuban (Take away), maxaad kula talineysaa?*

*Reymaa: Waxan leeyahay xeebta aad ha ugu dhowaanina, haddii uu qofku biyaha intuu ku dhowaado hilib digaag cunaayo waxaa laga yaabaa inuu jinni dafo, kaddibna la dhaho qofkii badda ayaa qaadday, ama libaax badeed ayaa qofkii dafay, qofkaas isaga ayaa halis is galiyey.*

*Su'aal: Waa arrin naxdinteeda leh, side buu qofka ku garan karaa inuu jinni goobta ka dhow yahay xilliga habeenkii ah?*

*Reymaa: Jinniga astaamaha lagu garto waxaa ka mid ah in iyada oo biyaha ay aad u degan yihiin aad dareento biyo tiixtiix ah oo meel ay ka soo kacayaan aadan u jeedin, ama hawo tiro badan oo haddana dabeyl ahaan aan u kaceyn, markaasba adkaarta qabso ama Meesha isaga tag.*

*Su'aal: Markii aad muuqaalka jinniga laheyd ee aad kor iiga soo muuqatay waxaa kaa yeerayey shanqar aan fahmi waayey, maxay aheyd?*

*Reymaa: Waan qoslayey, waayo mid jinniga ka mid ah ayaan isku dhici kaarnay, wuuna iga baqay oo wuu iga cararay.*

*Su'aal: Jinniga siduu u qoslaa?*

*Reymaa: UY UY UY UY .... waan dhahnaa, Xiiiish Xiish Xiiish .... Waan dhahnaa, Zuuuka Zuuuka Zuuuka .... Waa dhahnaa... Gabdhaha ayaa u bahan Zuuuka ...Zuuuka.*

*Su'aal: Aniga ayaad iga qosolsiisay. Bal muuqaalkaagii dhanka jinniga ahaa ee 3dii mar ee aad iskey tustay wuxuu ahaa seddax nooc oo kala duduwan oo haddana argagax badan I galiyey, aad ayaan kaaga naxay, hadda ma iga ogolaaneysaa in aad dadka u kala qeeydo ama muuqaalladaas u sharaxdo?*

*Reymaa: Xuuuuuuuuuuuuuuuuuux ... Zuuuka .... Zuuuka... Zuuuka....*

*............. **Fadlan ...Jawaabta... kala soco qeybta 6aad wareysigan.***

Abdulkadir Uukow

## *WAREYSIGII: GABADHII JINNIGA AHEYD EE REYMAA, QEYBTII 6-AAD*

*Qalinkii Abukar Albadri*

*Dib U Habeyntii*

***Abdulkadir Uukow***

*– Wareysiga qeybtiisa shanaad waxaa uu inoo marayey aniga oo Reymaa weydiinay su'aal la xiriirtay muuqaalkeeda jinniga ah, wareysiga qeybtiisa 6aad waxaan ku billaabeynaa isla su'aashii ugu danbeysay iyo jawaabteeda, waana sidan.*

*Su'aal: Reymaa! Muuqaalkaagii dhanka jinniga ah ee i tustay wuxuu ahaa seddax nooc oo kala duduwan oo qaarkood argagax badan i galiyeen, aad ayaan kaaga cabsaday markii aad dhawrka nooc isugu key bedeshay, hadda waxaan jeclaan lahaa in aad dadka asxaabteyda ah u kala qeexdo ama u sharraxdo muuqaalladaas?*

*Reymaa: Xuuuuuuuuuuuuuuuuuux … Zuuuka …. Zuuuka… Zuuuka… waxba ha iga cabsan, waa qoslooyaa uun e. Haa, waan u sharraxayaa. Waan sharaxayaa in kastoo aan ka baqayo in sidii aad u fiigtay oo kale ay dadka wareysiga aqrin doonana in ay u fiigaan.*

*Muuqaalka koowaad ee aan isu kaa tusay habka buluugga iyo jaalaha ee u ekaa Zabiibaanka, wuxuu ahaa muuqaal aan leeyahay 16 lugood, haddii aad arkeysay dhinac walba waxaan ka lahaa 7 lugood, horeyna waxaan ku lahaa labo lugood oo u siman sida dadka oo kale.*

*Nuucaas sabiibaanka ah, waa nooc gabadha jinniga ah ay qeybta danbe ka*

Abdulkadir Uukow

*tahay sida quraansho weyn oo kale, balse leh horaad bani'aadam oo kale, gadaal waxaan u leeyahay qeyb weyn oo xiitaanisa, ama lugaha dhaqaaqooda la guurguurta, waa calooshii oo dabada danbe igaaga taalla, lugaha 16ka ah, waa is dhaaf, 8 ka mid ah waxaa ay leeyihiin min hal xagal, 8 ka mid ahna waxaa ay leeyihiin min 2 xaglood. Marka aan soconayo waxaan u socon karaa sida caaro caarada, ama xarshaashada xeebta joogta ee hadba dhinac u orodda. Dhinac walba ayaan u dhaqaaqi karaa aniga.*

*Muuqaalkii kale ee aan ahaa maska jebisadda oo kale waa kan aan ugu naxdinta badanahay, sababta aan 6 ilbiriqsi kaliya isu kaa tusay waxaa ay aheyd in aanan ku dhibaateyn, waayo xasuustii caadiga aheyd ee aan kugula joogay ayaa iga tageysa kaddibna waan ku dhibaateyn karaa, balse inta aysan maskaxdeyda noqon tan jebisada jinniga ayaan is bedela.*

*Nooca ugu danbeeyey ee aan horeyna wejiga gabadha ka lahaa, gadaalna muuqaalka bisadda ka lahaa waa mid iska dhex dhexaad ah, kaas waan kugu cabsi gelin karay balse kuguma dhibaateyn karin, sababta aan 20 ilbirigsi u taagnaa hortaada aniga bisad-dadeed ah sidaas ayey aheyd.*

*Midda aan 16-ka lugood leeyahay waa marka aan ugu qurux badanahay xagga jinniga, suuraddaas aniga oo leh haddii aan soo hor maro meel ay dhalinyaro jinni joogto dhammaantood way suuxsuuxayaan saameynta ay ku yeelato quruxdeyda darteed.*

*Su'aal: Indhahaagan hadda caadiga ah markii aad lugaha badan laheyn kor kor ayey u jeexnaayeen, dhegahaaga sida baaldi oo kale ayey u sameysnaayeen, wax badan oo dahab u egna way ka raaraaraceen, waxa booyadda la eg ee barida danbe kaaga yaallayna gudahooda mindhicirada iyo wax ku jira way ii muuqdeen, runtiina muuqaal cabsi leh ayuu igu ahaa aniga, sidee buu muuqaalkaas u noqon karaa wax qurxoon oo aad qof ku soo jiidato?*

*Reymaa: Jinniga iyo Insiga isku aragti ma ahan, inta badan jinniga muuqaalka insiga way la yaabaan oo wuxuu la yahay suurad foolxun, waxayna u yaqaanaan geed-dhuleed, jinniga dadka muuqaalkiisa wuu la yaabaa, wuxuuna ugu yeeraa Dalaame ama geed-dhuleed, waayo dadka marka ay socdaan way garbo ridaan oo way dal dalaamaan, sidaas darteedna qosol iyo qaraaxo ayey jinku galaan marka ay arkaan insi socda.*

*Tan ah muuqaalkeyga in laga cabsado, insi ayaa iga cabsanaayee jinni kale haddii uu i arki lahaa waxay la noqon laheyd qurux mucjiso ah. Gabdhaha jinniga ah way iga maseyraan marka aan 16ka lugood leeyahay. Wiilasha jinnigana dhareerka ayaa ka dhamaan lahaa, qaar ayaa suuxaan markii an isha igu dhuftaan.*

*Su'aal: Markii aad muuqaalkaaga bedbedeleysay urta hawadana way is beddeleysay, markii aad maska aheyd waaban dhiman gaaray urta darteen, markii aad 16ka lugood laheydna wax baa si si kaaga soo gufaacayey, waxaan maxay ahaayeen?*

*Reymaa: Markii aan maska jebisada u ekaa waxaa iga soo uraayey suntan maska ee Mariirada ama mariidka la dhaho, waa waabaay, haddii aanan ilbiriqsiyo kaddib is beddeli laheyn maadan adkeysateen, markii aan 16ka lugood lahaa waxaa iga soo gufaacayey xoogaa biri-fidsi ah, waayo gadaal ayaan ka yara daacay, …Zuuuka … Zuuuka… Zuuuka … idinka dhuuso ayaad dhahdaan, marka waan iska biri fidsaday.*

*Su'aal: Jinniga barafuun iyo waxyaabaha la isku qurxiyo sida (Make Up) ma marsadaan, adigana ma marsataa?*

*Reymaa: Barafuun ma qabno jinni haddii aan nahay, waayo barafuunka shiir*

*jinni waxba kama beddeli karo, shiirka ninka jinniga ah haddii insiga loo bandhigi lahaa way wada dhiman lahaayeen, suntan Nukliyeerka wuu ka daran yahay, tan ah is qurxinta waan is qurxinaa, waayo jinku wuxuu leeyahay webiyada midabada, kuwaas ayaan ka soo dheeh-qaadanaa. Aniga markii aan insi isu ekeysiiyo is qurxin iskuma sameeyo, balse markii aan muuqaalkeyga jinniga ah leeyahay waxaan inta badan galaa wabiyada Asfar iyo Ajmal, kuwaas ayaan leenahay. Ogow jinni kasta ma gali karo webiyadaas, halkii mar gabadha jinni ah ay gasho waxaa laga qaadaa 2,000,000 oo Quuri. Quuri waa lacagta jinniga magaceeda, 1000kii Quuri waa 20,000 shilinka Soomaaliga, balse meel lagu sarrifo ma leh.*

*Su'aal: Darraad waxaad ii sheegtay in aad jirtay xafladda meherka saaxiibtaa Baadi'uun, waxaad ii sheegtaa jinniga sida uu isu mehersado?*

*Reymaa: Jinniga way is mehersadaan, balse mehersiga ka hor waa la is mijin xirtaa, yacni gabadha waxaa ay gashaneysaa jijin sheegeysa in ay saaxiib leedahay, jijintaas waa in ay u keentaa wiilka jinni ee ay saaxiibka noqdeen hooyadiis, iyada iskama soo gashan karto, iskamana siibi karto. Markii la mijin xiro kaddib ee xiriirkooda xoogeysto, jaceylkoodii indhaha ku jiray ayaa wuxuu u gudbayaa dhabarka, gaar ahaan halka ay iska galaan labada garab ee dhabarka ah, markaas gabadha waa la luqun xiraa, waxaa loo xiraa kuul sheegeysa in wiilkii loo mijin xiray uu jaceylkiisii ka raariday dhabarkeeda, taas oo macnaheedu tahay in ay gaartay heer ay masuuliyad qaadi karto, kaddib waxaa ay u gudbaan marxalad la xis-xiiro, madaxa qeybta maskaxda ku aaddan ayaa tinta laga xiiraa, kaddibna kugta dhexe ayaa xoogaa lagu reebaa, intaas la reebayna waa la titcaa, qeybaha labada dhinac kaga hartay tintana waa la dabaa, kaddibna tintii yareyd ee titcaneyd ayaa sideedii loo daayaa, tii dabneydna waa la seexiyaa.*

*Marxaladda ku xigta waa Qalbi-waraabin, gabadha qalbigeeda ayey u fureysaa wiilka, kaddib wuxuu bilaabayaa in uu ku shubo burhaantiisa,*

Abdulkadir Uukow

*markaas waxaa ay qaadaneysaa muddo in geedkii uu qalbigeeda ku tallaalay uu soo fixo, kaddibna inta laamo dhalo, caleemo yeesho, kaddibna magool ayuu noqonayaa.*

*Markii ay laamaha geedka magoolaan, waxaa gabadha wejiga loogu xiraa shab yar oo sharaxaad ah, kaas oo muujinaya in ay heer xoodaamo ah (Romantic) ku dhow dahay, waxaana u xiraya wiilka aabihiisa. Ugu danbeyn, marka geedka qalbiga uu ubaxyo soo fiixo, waxaa gabadha horaadadeeda la geliyaa saab dahab ah, kaas oo ka difaacaya in ay siigo ku dhacdo, waayo waa halkii uu ka imaan lahaa dalaga uu ku noolaanayo canugii la dhalo.*

*Marka heerkaas la soo gaaro, gabadhu way gal siibaneysaa, way qolof dhacsaneysaa, qoloftaas waxay kaga tageysaa guriga wiilka hooyadiis irrideeda, kaddibna qoloftaas ayey gashanayaan taabuuk, ama sanduuq, taasi macnaheedu waa in ay gabadhii hanteen. Markaas ayey aqiyaar soo dirayaan ciddii galkii gabdha heysatay.*

*Marka koowaad ee la is arko waxaa reerkii ay galkii ku wareejinayaan ugaaska reerka gabadha ay ka soo jeeddo, cid walba ugaas ayey leeyihiin, mararka qaar xitaa gabadha iyo wiilka isku ugaas ayey noqon karaan, balse waa in xuubkii gabadha ka dhacay ee ciddan taabuugga gashatay ay ugaaska ku wareejiyaan, kaddib ugaaska ayaa go'aaminaya inta xoolo ee gabadha laga dhiibayo, sooryada, goorta la guri geynayo, meherkeeda, duraamadeeda, tisqaadkeeda, sacmaalkeeda, saandhabadkeeda iyo weji furkeeda.*

*Markii ay intaas bixiyaan reerkii gabadha doonayey, gabadha waxaa la soo saarayaa gaari faras duulaya, kaddibna waxaa la keenayaa gurigii uu diyaarsaday wiilka.*

*Markaas jinnigii uu dhan oo meeshaas lagu casuumay ayaa gabadhii muddo bil ah u tumaya oo u mashxaranaya.*

*Inta ay mashxaradda socoto, gabadha jinka ah cunto lama siiyo, waayo waxaa la doonayaa in ay tabar beesho, oo wiilka jinka ah marka qolka loo*

Abdulkadir Ulkow

*geeyo aysan iska celin karin, sababta oo ah jinka raaxadooda xagga gogosha waa xanuun, gabadhii xubinteedii waxaa ay ku taallaa xabadkeedii, wiilka jinka ahna wuxuu xubintiisa ku leeyahay labada lug ee hore dhexdooda, marka isku aaddidii ayaa dhib ah, gabadhiina ma adkeysan karto, si loogu qasbo nin aysan wiilka diidin ayaa bil dhan loo gaajeysiinayaa, biyo kaliya ayey cabbeysaa.*

*Su'aal: Haddii qof insi ah uu gabar jinni ah doonayo in uu guursado ma inta aad sheegtay ayaa lagadoonayaa?*

*Reymaa: Maya! Waayo ugaaska jinka qof insi ah in uu gabar jinni ah xiriir la wadaago ma ogola, waalidiinta jinnigana sidoo kale, balse gabdhaha jinniga ah ayaa ka hela wiilasha insiga ah, waayo way ka raaxo macaan yihiin wiilasha jinniga ah, sidaas darteed gabdha jinniga ah waxaa ay ku qasbanaaneysaa in ay ninka insiga ah bilaa shuruud ogolaato, wax dhaqaale ama shuruud ahna kuma xireyso, haddii ay shuruudo ku xirtana waa kuwo xiriirkooda quseeya ee ma ahan kuwo dhanka arrimaha dhaqanka ama dhaqaalahaquseeya.*

*Jinniga dhaqankiisa xaga arooska waa adag yahay, waana dhib badan yahay, sidaas darteed gabadha jinni ee doonaysa in ay wiil insi ah raaxo la wadaagto billaa shuruud ayey is dhiibeysaa, kaliya xiriirkooda iyo sida uu ku sii jiri karo shuruudo ku saabsan ayaa laga yaabaa in ay la timaaddo.*

*Su'aal: Gabdhaha insiga inta badan waa bikro inta aan la aroosin ka hor, waana la gudaa oo waa la toltolaa in kastoo qaar sunno gud ahi jiraan, idinka gabdhihiina jinniga ah ma la idin gudaa?*

*Reymaa: Haah, gudniinka jinniga ayaa daran, gabadha jinniga ah haddii aan*

*la gudin maba loo noolaan karo, wixii noolba way kufsan laheyd, waayo dareerayaasha rabitaanka kordhiya ee jirka gabadha jinniga ku jira waxaa ay 2 milyan oo jeer ka badan yihiin kuwa gabadha insiga ah, teeda kale insiga xishood ayaa reeba, jinni xishood ma qabo, ereygaa xitaa luuqaddeena kuma jiro, markii aan insiga bartay uun baan bartay ereygaas, waana wax wanaagsan in la xishoodo.*

*Tan kale ee ah gabadha jinniga ah haddii aan la gudin kuma dhacayo dheecaanka haduufaanka, yacni haduufaanku waa wax u dhigma sida dhiigga caadada, haddii uusan haduufaan ku dhicinna lama mijo xiran karo, qalbigeedana laguma sameyn karo qalbi-waraabin, sidaas darteed jinniga waa la gudaa, anigana waan gudanahay.*

*Su'aal: Gabdhaha insiga ah waxaa laga dhiibaa yarad, waxaa jirta sooryo, gabadha meher ayey leedahay, waxaana lagu dhiibaa xoolo sida Geel, Lo' ama Fardo iyo wixii la mid ah, lacagna waa lagu dhiibaa, idinka kuwiina maxaa laga bixiyaa, maxaase lagu bixiyaa!?*

*Reymaa: Sooryadu way jirtaa, waan idinkala mid nahay, meherka gabadhana sidoo kale, waxaan idin dheernahay wax la yiraahdo duraamadeeda (ama shar xijaab), tisqaadkeeda (hantida ay ku noolaaneyso waligeed), sacmaalkeeda (Dahabkeeda iyo dhagxaanta qaali ah, sida luulka, Qalinka, Dheymanka), saandhabadkeeda (Guri ay ku damaashaaddo) weji furkeeda (Guriga ay ku noolaaneyso) iyo wax yaabo kale oo badan.*

*wiilka jinniga ah waa inuu bixiyaa gabadha dharkii, kabihii, dahabkii, dhaqaalihii 1000 sano ay ku noolaan laheyd inta uusan guriga geysan.*

*Su'aal: Marka uu intaas dhiibo kaddib, ma biil ayaa laga rabayaa?*

*Reymaa: Maya, waxa uu dhiibay ayuu gabadha kula noolaanayaa, noloshiisa inta ka dhiman wax kale ma weydiin karto, hal mar ayaa hantida dhan iyada la siiyaa, balse wixii uu shaqeysto ee kale waxaa lahaanaya ilmihiisa.*

*Su'aal: Yaa isku kiin mehriya, ma culumaa'udiin ayaad leedihiin?*

*Reymaa: Haah! Waxaan leenahay culumaa'udiin, waxaan leenahay odayaal iyo waxgarad, waxaan leenahay hoggaan dhaqameedyo aad u yaqaana dhaqanka jinniga, dhibaatadu waxay tahay xishoodka ayaa ku yar, balse kuwa culumaa'udiinka ah waa dad diinta ku dheggan oo aan xumaan ku kicin, balse odayaal dhaqameedka, waxgaradka iyo kuwo kaleba xishood ma leh.*

*Su'aal: Waxaa tiri xishood ma jiro, ereygana afkeena kuma jiro, walba ceeb ma jirtaa ee ereygaas ceeb ma idinkugu jiraa luuqadda?*

*Reymaa: Maya! Sababta oo ah insiga agtiisa waxaa ceeb ka ah in wax la xado, in la zineysto, in been la sheego, waxaasna jinniga agtiisa caadi ayey ka yihiin, kuwa Muslimka ay ayaa diin ahaan isaga ilaaliya, balse kii sameeya laguma ceebeeyo. Jinniga noloshiisa waa mid xishood ka dheer oo waxa ceebta ah ay caadi u yihiin. Jinni aan wax xadi Karin waxaaba loo arkaa inuusan karti laheyn, balse waxaa ay ku fiican yihiin tuug saqajaan ma jiro, wax waaweyn oo caqliga ka weyn ayaa la kala xadaa.*

*Su'aal: Caadiyan jinniga imisa xaas ayuu guursadaa?*

*Reymaa: Qaarba waa si, kuwa muslimka ah 4 ayey guursadaan, balse kuwa gaalada ah waxaad arkeysaa kuwo boqolaal xaas qaba, kumanaan kun oo carruur ah leh, hantidooda aan la xisaabi karin, qaar boqolaal naag qaba oo faqiir ahna way jiraan.*

*Su'aal: Naagaha jinniga ma kala maseyraan?*

*Reymaa: Maseyr iyo is cadaaweysi ayey nafta isaga qaadaan, naagaha jinniga ee la isla qabo isma arki karaan, way is dilaan, way isa sixraan, way isa sumeeyaan, way is qumiyeystaan, way is xasdaan, dhibaato badan ayey isu geystaan, sababta dhimashada naagaha la qabo ee jinniga ay u badan tahay waa saas. Insiga waxaa ay inagaga fiican yihiin way maseyraan balse xadgudubka intaas la eg iskuma sameeyaan, jinniga nolol isuma ogola mar haddii la isla guursado, insiga ayaa ka dulqaad badan, kana daacadsan.*

*Su'aal: Jinniga magac bixintiisa muxuu ku saleeyaa? Gabdhaha magacyo qurxoon ayaa loo bixiyaae?*

*Reymaa: Magacyada gabdhaha waxaa ay ku saleysan yihiin diin, dhaqan, muruq-maal, dhaqaale, sumcad iwm. Tusaale magaceyga Reymaa macnihiisa waa boqorad, ama amiirad, waayo waan kuu sheegay aabahey wuxuu yahay, iyo booska uu ka joogo Qabiilka Si'lat, Nujuum waxaa loogu bixiyey saaxiibtey aadna way u qurxoontahay, waana qof soo jiidasho leh, walaashey Ru'yatul Ceyn magaceeda ayaad ka garan kartaa, gabar la yiraahdo Reytuu ayaa jirta. Laakiin ragga waxaa lagu saleeyaa cabsi iyo xoog. Tusaale waxaalkey waxaa la dhahaa Jahsuul, macnaheedu waa burburiye, mid kale waxaa la dhahaa Reylaag, macnaheedu waa kii dabeysha dadka ku afuufaayey, waxaa adeerkey la dhahaa Haahuul, waa mid aad u xoog badan oo laga cabsado.*

*Su'aal: Jinniga ma is kufsadaa, ragga jinniga ah ma kufsadaan gabdhaha jinniga ah?*

*Reymaa: Haah, wiilasha jinniga ah way kufsadaan gabdhaha jinniga ah, gaar ahaan kuwa aan wiilal laga baqo la dhalan, waxaa kale oo ay kufsadaan gabdhaha insiga ah, gaar ahaan kuwa aamina in jinni uu la jiro. Balse jinniga waxaa uu aad uga qaraabtaa naagaha insiga ah ee belwedda leh. Naagaha jaadka cuna, kuwa aan dukan, kuwa shiishada dhuuqa, iyo kuwa biirta caba, shayadiinta iyo jinniga way isku bedbedelaan.*

*Waxaan hayaa video-yo badan oo naagahaas qayila ee marka ay xumaanta galaan uu jiniga kufsado laga duubay, islaamaha qayila shayaadiinta waxaa ay ku sameeyaan fuxshi badan, iyaga oo aan dareemeyn, meel walba ayuu kaga kaadiyaa, kaddibna wuu ka muraadsadaa, kaddibna waxay leedahay jirka dhan baa i burbursan, muxuu jirka u burburiwaayey, waayo mararka qaar 100 jinni ah baa isku dhaafeysa, sheydaankana intuu meel u fadhiisto atuu ku qoslayaa sida ay jinniyeyaasha u kufsanayaan.*

*Su'aal: Jinniga siduu isu salaamaa?*

*Reymaa:Jinniga Muslimka ah wuxuu isku salaamaa Salaanta Islaamka 'Asalaamu Caleykum' jinniga gaalada ahna wuxuu isku salaamaa suulka oo la taago, kaddibna waxay is dhahaan "Sussa…Caac… kiikah… hiiha'*

*Laakiin jinniga dhalinyarada ah waxay isku salaamaan "Tiisha… Zeketaa…Dhiidhah…" gabdhaha aad ayey u jecel yihiin in lagu salaamo "Tiisha.." kaddibna isha dhag loo siiyo.*

Abdulkadir Ulkow

*Su'aal: Waxaad sheegtay in jinniga kufsado naagaha jaadka cuna iyo kuwa shiishada caba, jinga ma kusafadaa gabdhaha uu ka kor hadlo?*

*Reymaa: Badanaa gabdhaha uu jinka ka kor hadlo waa been, waayo gabar salad dukaneysa jin kama kor hadli karo, laakiin gabdhaha go'aanka jilicsan ama kartida yar, markii ay wiil jeclaadaan waxay dhahaan wuu iga kor hadlay. Haddii uu wiil gabar ka kor hadlayo waa in gabadha aamusnaataa, korkeeda cod wiil laga maqlaa, balse iyada ayaa daldalmeysa, kaddibna waxaa loo niyeysanayaa in uu wiil ka dhex hadlayo, waxaas wax jira ma ahan. Arrinta ay ma kufsadaa haa, jinni naag maba galo, haddii uu galana wuu kufsadaa, waaba cadadiisa. Sababta uu gabdhaha jinka u galo waxaa ka mid ah gabdha oo quruxdeeda u bandhigeysa dadka jidka jooga, kaddibna jinnigiina jidka wax buu ka joogaa, dadka ayaan u jeedin mooyee wuu dhooban yahay jinniga. Marka ay gabar quruxdeeda soo bandhigto oo soo jiidasho u yeesho 10kii indhood ee ku dhacda 3 ka mid ah waa il jinni, il qumayo ama il xasad ama il nacab, indhahaas ay soo qaadatay ee ay iyada soo jiidatay ayuu jinniga ka raacayaa, kaddibna nolosheedii dhan ayuu seejinayaa.*

*Gabar reerkooda gabar u ah oo aan weligeed wiil insi ah u galmood ayaa waxay lumineysaa bikradeeda mana fahamsana waxa ku dhacay, sababta oo ah jinnigii ayaa janadii yareyd ee lugaheeda u dhexeysa mar hore ka qaraabtay, jinniyada qaar joogto ayeyba ka dhigtaan. Marka gabdhaha aaminsan in jinni la jiro, inta iska dhaafaan quraafaadka ha cuskadaan quraanka, wallaahi haddii kale canug jinni oo wecel ah ayey dhalayaan iyaga oo aan ogeyn goorta ay uur qaadday.*

*Su'aal: Ma dhacdaa in jinni uu gabar uureeyo?*

*Reymaa: Haah! Soo ma arkin gabar aan weligeed wiil lugaheeda u kala furin,*

Abdulkadir Dukow

*oo haddana uur ku soo baxayo, waayo jinnigii ayeysan iska naareyn, markaas ayuu sida uu doono ka yeelanayaa.*

*Gabdhaha qaar baa waxay ku leeyihiin wuu ila socdaayoo marka la I guursado ayaa wixiisa la siinayaa, yaa ku guursanaya jinnigii ayaaba gabarnimadaadii ku seejiyaye, horaadadii buu ka jiidjiidayaa, markaas ayaad arkeysaa gabadhii yareyd oo rajabeeto xiran, duf ku baxe kuwa aadan u jeedin ee ku rifaya iska celi, quraanka iyo wardiga ku dheg, markaas jirkaaga nadiif ayuu kuu ahaanayaa, haddii kale cad uu jinni ka soo daalay ayaad inta lagu aroos nin la hor tageysaa.*

*Su'aal: Waa arrin yaab leh, sidey gabadha ku ogaan kartaa in jinni uu kufsanaayo?*

*Reymaa: Waxay ku ogaan kartaa culees buu saarayaa, sidii ninka caadiga ah buu jirkeeda u walaaqayaa, oo isugu dul ruxaayaa, balse ma arki karto, haddiiba ay aragto lugaheeda oo dhabanaayo ama jareynaayo, ama jiririco tiro badan, ama in humaag been ah dul imaanayo waa in ay adkaarta boobsiisaa. Jinniga ma tiiro badna, hawshiisa wuxuu ku kala tuuranayaa 2 daqiiqo, balse shahwadiis aad ayey wasaq u tahay, waana sun oo gabadha jirkeeda foolxumo ayey ka dhigeysaa, bikradeeda way ka jabeysaa oo in ay bikradii jabtay iyadaba way arkeysaa, dhididkeedana wuu soo urayaa mar haddii shahwad jinni ay korkeeda ku dhacdo. Marka gabdhaha ha is gaaraan.*

*Su'aal: Gabdhaha jinniga ah iyaga ragga insiga ah miyay kufsadaan?*

*Reymaa: Khiiiiiiiiiiiiiiiiiiiikh………….. Dhadhadhadha…….Uhuuuuuuuuwha…….…..*
***Fadlan …Jawaabta… kala soco qeybta 7aad wareysigan.***

Abdulkadir Uukow

## *WAREYSIGII: GABADHII JINNIGA AHEYD EE REYMAA, QEYBTII 7-AAD*

*Qalinka **Abukar Albadri***

*Dib U Habeyntii*

***Abdulkadir Uukow***

*– Wareysiga qeybtiisa lixaad waxaa ay inoo mareysay aniga oo Reymaa weydiinay su'aal la xiriirtay shahwada gabdhaha jinniga ah in ay dhibaateyso ragga insiga ah iyo in kale, wareysiga qeybtiisa 7aad waxaan ku billaabeynaa isla su'aashii ugu danbeysay iyo jawaabteeda, waana sidan.*

*Su'aal: Gabdhaha jinniga ah iyaga shahwadooda ragga insiga ah ma dhibaateysaa?*

*Reymaa: Khiiiiiiiiiiiiiiiiiiiikh………….. Uhuuuuuuuusha… Waxaad rabtaa in aan sida qaac libdhaya kuu dhex maro, sanka kaa galo, afka kaaga baxo, kaddibna dhegahaaga qaac ka keeno, sideed iigu dhihi kartaa gabdhaha jinniga shahwadooda way dhibaateysaa ragga insiga ah? Ma anigaa dhibaateynaya ninka aan jeclahay? Aaaaaaaaaaah…. Zabaabuurta ha igu kicin!*

*Su'aal: Reymaa! Is deji, aniga su'aal uun baan kaa weydiiyey! Waxba kaama sheegin, ee lacala haddii gabar jinni ah ay gogol la gasho nin insi ah, kaddibna dheecaankoodu is gaaro maxay tahay cawaaqibta ku dheceysa ninka insiga ah ee shahwada gabadha jinniga ay korkiisa taabatay?*

*Reymaa: Gabadha jinniga ah shahwadeeda waa caadi, waayo suurad insi*

Abdulkadir Uukow

*ayey ugu imaaneysaa ninka, laakiin marka ay suurad jinni ugu timaaddo ee ay isu galmoodaan markaas ayaa qofkaas nolol miyir qab ah ugu danbeysa, waayo tafaasiisheeda jinniga ayey ku dhex neefsaneysaa, maskaxdiisa, qalbigiisa iyo niyaddiisa ayey teeda ku dhex qabaneysaa, sidaas darteed ninkaas wuu qaalanayaa, adduunka uu joogay ee caadiga ahaa maahee mid kale ayuu galayaa. Laakiin haddii ay suurad insi ugu timaaddo, oo ayna jinni muslim ah tahay waa caadi wayna raaxeysanayaan, kaddibna caadi ayuu isaga joogayaa.*

*Su'aal: Runta ii sheeg maanta, hana igu xanaaqine, haddii aad muslim dhab ah tahay Maxaad adkaarta uga carartaa?*

*Reymaa: Aniga adkaarta kama carrao, Muslimna waan ahay, balse adkaarta uu insiga aqristo waxaa loogu talo galay inuu jinniga oo dhan isaga xijaabo kiisa Muslimka ah iyo kiisa gaalka ahba, waayo waa uun ka suurad duwan oo isaga aan arkeyn, marka adkaarta waa hadiyad uu ALLAAH siiyey insiga, gaar ahaan Muslimiinta, haddii ay si sax ah uga faa'iideystaan xitaa insiga ayaa isaga xijaabi kara insiga dulminaya, marka aniga adkaarta kama cararayo, balse marka uu qofku aqristo Ilaah ayaa qofkii asturaya oo wuu ka asturmayaa jinni oo dhan iyo shar oo dhan.*

*Su'aal: Gabdhaha jinniga ah ragga insiga ah miyey kufsadaan, sida ragga jinniga ah ay u kufsadaan gabdhaha insiga oo kale?*

*Reymaa: Haa! Way dhacdaa in ay kufsadaan, laakiin waxay u dhacdaa laba nooc. Midda koowaad habeenkii marka uu qofka hurdo, haddii uusan adkaar aqrisan waxaa dhici karta in uu riyo ku sameeyo galmo, taas oo ay shanfaroodlaha u yaqaanaan 'Junuub' markaas inta badan gabar jinni ah ayaa ku lug leh, sida kaliya ee looga gaashaaman karo waa adkaarta. Midda labaadna waa in ay gabadha jinniga ah si toos ah ugu tagto ninka*

*insiga ah, kaddibna isaga oo soo jeeda ay ka qaraabato, iskamana celin karo, waxaana u badan 4 nooc oo ragga ka mid ah, sida kuwa aan dukan, tuugada ama burcadda, sixiroolayaasha iyo kuwa jinniga qaaciya ama shida qaarkood.*

*Su'aal: Ma iyaga oo arkayo ayey kufsaneysaa mise way is qarineysaa?*

*Reymaa: Ragga ma dukadayaasha ah iyo tuugada badanaa iyada oo is qarineysa ayey kufsaneysaa, waxaad arkeysaa nin soo jeeda oo naftiisa aan xakameyn karin oo inta dareenkiisa yara kaco ay shahwada soo dhaafeyso, mararka qaar isaga oo waddo maraayo ayey ku dhaceysaa, waayo meeshii ay ku aragto ayey ku kufsaneysaa, balse sixiroolayaasha, marka horeba iyaga iyo shayaadiinta ayaa ballamo gala, kaddibna iyaga iyo kuwa wax shida naftooda iyo tan reerkoodaba waxaa la wadaaga jinni iyo sheydaan.*

*Su'aal: Sixiroolayaasha iyo dadka jinniga la shaqeysta, sida kuwa mingis, booranaha, duulasha maxay tahay ballanta kala dhexeysa shayaadiinta iyo jinniga?*

*Reymaa: Runtii qofka sixiroole ma noqon karo isaga oo aan seddax shey sameyn. Kow in uu diinta ka baxo waaye inta uusan sixiroole noqon, labo waa in uu kaadidiida ku qubeystaa, kaddibna sheydaanka caabudaa, seddax waa in ay isaga iyo sheydaanka midba marka isku sameeyaan falaadxumo, seddaxdaas shey isaga oo aan sameyn sixirool ma noqon karo, waayo qofka waxba ma sixri karo haddii uusan sheydaanka la maleegeyn sixirka.*

*Kuwa jinka la shaqeysta sida booranaha, mingiska iyo duulasha, iyagana waxaa ay la shaqeystaan jinniyo aan muslim aheyn, sidaas darteed qofka marka koowaad waa inuu diinta Islaamka ka baxaa, jinnigaas gaalka ah wixii uu samey dhaho sameeyaa, qaarkood wuxuu ku amraa in ay kidaabka ku istaagaan, wayna sameeyaan, qaarkood wuxuu ku sameeyaa faraxumen, kaddibna wuxuu ku handadaa wixii uu ku sameeyey, qaarkoodna wuxuu la wadaagaa naagta ay qabaan, xitaa naagta ma diidi karto wayna og tahay,*

Abdulkadir Ujurow

*waayo marka ay qofkan noloshiisa ku soo biirto ayaa si tartiib tartiib ah loo handadayaa. Arrinta ugu yaabka badan waxay tahay, sixiroolayaasha iyo dadka jinniga la shaqeysta intaba raganimadooda waa eber, jinniga iyo sheydaanka ayaa marka hore ka baabi'iya oo isticmaala, kaddibna maadaama aysan diin shuqul ku laheyn marka uu naagtiisa u tagayo sheydaankii ayaa isaga dhex galaya oo naagta la macaamilaha iyadana waxaa ay arkeysaa muuqaalka ninka.*

*Qaarkoodna badanaa maba qabaan naag oo waxaa ay ka zineystaan naagaha ugu taga in ay jinka ka shidaan, iyo ragga sidoo kale jinka laga shido.*

*Su'aal: Naagaha ninka laga shido iyaga xaalkooda waa side?*

*Reymaa: Naagaha jinniga laga shido horta waxaa iska leh jinniga, sida naagtooda ayey joogto ula dhaqmaan, waxaa intaas u dheer in nimankan mushrikiinta ah ee jinniga shida ay faraxumneeyaan marka inta ay meeshooda ugu tagto kaddibna ay Meesha ku suuxdo. Kuwo yar oo quraanka iyo adkaarta ku dadaala ayaa jira oo ka badbaada, balse qoftii aaminta in jinni laga shidi karo sidaas ayey iimaankeedii Islaamnimada ku weysay. Saaxiriinta iyo kuwa jinka la shaqeysta waa gaalo mushrikiin ah oo dulli ah, Ilaahey wax inooguma daro.*

*Su'aal: Waxaa jira dad jinka quraan ku daweeya, kuwaas iyagana maxay tahay xaaladdooda?*

*Reymaa: Waa jiraan kuwo quraan si sax ah ugu daweeya, waxaa ka mid ah Sheekh Daa'uud oo maalintii aan arkay isaga oo wiil naag JAAN ah ka saaraya illaa hadda aan maalinna jirkiisa taaban waayey, waayo diinta ayuu u adeegsadaa in uu shayaadiinta ku gubo, dadkaas way jiraan sidaas jinniga ula dagaala, waana wax sax ah, balse dadka jinniga la shaqeysta intooda ugu badan waa Mushrikiin, waa gaalo, waana dad jinniga uu*

*sharafti ka qaaday oo wasaqnimo tii ugu liidatay ku sameeyey, sheydaanka isaga oo aan ku dulleysan kula shaqeysan mayo, waayo ku aamini maayo oo cadowgiisa ayaad tahay intaba aad ALLAAH rumeysan tahay, si sheydaanka aad ula shaqeysan karto qofku waa inuu iimaankiisa iyo rumeynta ALLAAH ka baxaa oo sheydaanka caabudaa, sheydaanka isu dhiibaa oo fara xumeeyaa, sheydaanka u ogolaadaa inuu xaasaskiisa iyo caruurtiisa la isticmaalaa, marka uu saas u Sharaf dilo kaddib wuu u adeegayaa, waayo waxa ay ka wada shaqeynayaan waa dhibaatada ummadda, sida sixirka, iyo in ay jinniga wax ku daweeyaan oo qof xanuunsan jinni ugu yeeraan oo dhahaan qofkan daweey. Taasina waa shirki, Ilaahey ha inaga badbaadiyee.*

*Su'aal: Dadka u taga nimanka jinniga la shaqeysta iyo kuwa sixiroolayaasha ah maxaad kula talineysaa?*

*Reymaa: Waxaan leeyahay maanta waa adduunyo, waqtiga aad dhimaneyso ma ogid, qof sheydaan la shaqeysta ha u tagin, ha weydiisan inuu wax kuu qabto, saaxirna ha u tagin oo qof ii sixir ha dhihin, waayo isku denbi ayaad noqoneysaan, sida uu mushrik u yahay ayaad u noqoneysaa.*

*Waxaa hubaal ah dadka meelaha wax lagu qaaciyo ku xiran nolosha ayey ku fadeexoobaan, nolol ciriiri ayey ku jiraan, waxaana u sabab ah la macaamilka shayaadiinta. Gabdhaha sameeya in waxa la dhaho madiiddada nimankooda loogu aqriyo, markaas ay waxaas sameyneyso ayaa iimaankeedii dabadeeda ka baxayaa, kaddibna maalintaas kaddib waa qof sheydaan la macaamishay oo xarigii ALLAAH goysay, Ilaah ha naga badbaadiyo.*

*Waxaan kula talin lahaa insiga in ay iska jiraan afartan qeybood ee insiga ah.*

1. *Dadka wax uumiya ee jinniga u yeera, ee gabdhaha ka shida.*
2. *Kibaatgaablowga, iyo kuwa madiiddooyinka aqriya*
3. *Dub gurka, ama kuwa xoolaha dadka ka sixra*

*4. Sixiroolayaasha caadiga ah ee dadka sixra.*

*Waxaa ugu badan dumarka oo dadka sixiroolayaasha xiriirka la leh, iyaga ayaa adeegsada oo dhaha naagta ninkeyga qaba iga sixir, ninkeyga madiiddo iigu aqri, ninkeyga in uu I jecel yahay ii fiiri, ninkeyga inuu I qiyaameeyo ii fiiri.*

*Dhammaan waxa uu saaxirka gabdhaha u taga u sheego waa been, sidaas ay tahayna gabadhii wax weydiiso diinta waa ay ka baxday, waa mushrikad, Ilaahey ha u towbad keenaan intii horey u sameysay, inta aan sameynna ha iska jiraan in ay shirkigaas ku dhacaan.*

*Su'aal: Waxaad sheegtay in gabdhaha insiga ah uu jinniga uureeyo, haddii uu uureeyo imisa bilood ayey wadaan uurka?*

*Reymaa: Waqtiga ugu badan ee ay wadaan waa 6 illaa 7 bilood, canuga jinniga caadi uma dhasho oo wuu dhicisoobaa, marar dhif ah ayey dhacdaa inuu 7 bilood gaaro ama dhaafo oo dhameys ku dhasho, balse isaga oo meyd ah ayuu dhashaa, badanaana muuqaal laga cabsado oo mucjiso ah ayuu leeyahay.*

*Su'aal: Canugga uurka jinniga miyuu dhashaa caadiyan?*

*Reymaa: Maya wuu dhiciseeyaa inta badan, mararka qaar isaga oo muuqaallo laga naxo leh oo mucjiso oo kale ah ayuu dhiciseeyaa, xitaa naago la qabo oo jinku u dhuuntay ayey taas ku dhacdaa, waa haddii ay dadku hilmaamaan adkaarta iyo cibaadada ALLE.*

*Su'aal: Jinniga ma isa sixraa gudihiisa, mase dhacdaa in uu jinnigu sixro dadka ama insiga?*

*Reymaa: Jinniga wuu isa sixraa, wuu is lugooyaa, wuu isku tuntaa, balse waxaas dhan waxa sameynaayo waa jinka aan Muslimka aheyn iyo dhayaadiinta, waayo waxaa ay aaminsan yihiin xaasidnimo iyo isu awood*

Abdulkadir Ujukow

*sheegasho kaliya. Tan ah insiga miyuu sixraa jinka, haa jinni wuu sixraa insiga, waayo sixroolayaashaba waxaa ay adeegsanayaa oo sixirka u fulinayo waa jinni, sidaas darteed jinniga mararka qaar dadka wuu sixraa, qoysas dhisnaa ayuu isku diraa, inta badan gabdhaha ayuu biyaha ay cabbaan iyo cuntooyinka ay cunaan wax ugu daraa, markaas ayey ninka naceyb u qaddaa ama buuq joogto ah kala kulmaa, waxaana sabab u ah gabdhaha ayaa ugu badan dadka adkaarta hilmaama.*

*Jinniga wuxuu sixraa qofka uu fursad cibaado la'aan ah ku helo, qofka uu fursad iimaan la'aan ah ku helo, ama dadka iska niyadda wanaagsan balse qafladda isaga jira, kuwaas wuuna sixraa, wuuna ku xadgudbaa oo rag iyo dumarba wuu la dhaqmaan, iyaga oo aan ogeyn ayaa gabdhaha noocaas ah ee aan cibaadada iyo adkaarta badin uu jinni iska maamushaa, halka ragga kuwooda tuugada, taariku salaadka iyo kuwa aan adkaarta aqrisan ay dhibaato ka heysato oo ay noloshooda aan muuqan ay wasaqeyaan gabdho jinni ah oo gaalo ah, oo weliba saqajaamiin ah.*

*Su'aal: Ma jiraa hab looga badbaadi karo jinniga, shayaadiinta iyo sixiroolayaasha?*

*Reymaa: Hal hab kaliya ayaa looga badbaadi karaa, waa in uu qofku daa'imo Qur'aan iyo adkaar, haddii uu qofka intaas ka caajiso mar uusan waxba ka gaarin oo la galay ayuu shaleynayaa, haddii uu saaxir iyo sheydaan u tago si loo daweeyana cadaab aakhiro ayuu ku waarayaa.*

*Su'aal: Waxaa jira dad badan oo waalan, kuwo waalidkood ayaa meel ku xiray, kuwo jidadka ayey ku dhibaateysan yihiin, kuwo marna way ku dhuftaan, marna caadi ayey noqdaan, dadkaas xaaladooda maxaad ka leedahay?*

*Reymaa: U fiirso! Gabar walba oo waalan wax uun xun uun bey lugta kula jirtay, wiil walba oo washayna fal xun uun buu lugta kula jiray inta uusan waalan ka hor, haddii uu qofku doonayo in uusan waalan waa inuu qofku joogteeyaa ku xirnaanta ALLAAH, anaga jinnigaba way waashaan, way isa*

*sixraan, wayna is dhibaateeyaan, way is ileystaan, laakiin waxaa lagu kala badbaadaa labo middood, in aad ALLAAH ku xiran tahay iyo in aad ALLAAH ka furatay oo aad ku was wax dhibaateynaya ku biirtid aakhirana cadaab u diyaar garowdid, labadaas waxaan ka aheyn waa qof naftiisa dayacay oo kadibna meelaha ku waashay, dadka daroogada cuna sheydaanka wuu la joogaa, markaas ay cunayaan, cabayaan ama dhuuqayaan, haddii uu rabo wuu waalayaa, haddii uu rabo wuu kufsanayaa, haddii uu rabo wuu ku dul kaadinayaa, kuwa qaar wuxuuba ka dhigtaa meel uu wasaqda ku daadiyo.*

*Su'aal: Jinniga iyo shayaadiinta cunto noocey cunaan?*

*Reymaa: Jinniga Muslimka ah waa jinni cuntooyin caadi ah cuna, sida insiga camal uun buu u nool yahay, balse jinniga ah, weliba mujrimka ah iyo shayaadiinta waxaa ay quutaan gaalka bullaacadaha, wayna ku faraxsan yihiin, urka, urgunka iyo laameerka maba dareemaan oo bullaacadaas ayey quutaan, waxaase ka liita midkaas bullaacadda quutay qof addoon u ah oo haddana aan is ogeyn. Sheydaanka kaadidiisa urteeda haddii insiga daaha looga qaadi lahaa qof noolaan lahaa ma leh, haddana dadka qaar saacad walba ayuu dhegaha, afka kaga kaadiyaa. Soo ma arkin dadka tubaakada cuna, way iska cunaan, kuwa shiishada dhuuqa soo ma arkin, urka shiishada dadbey  caraf la tahay, gabdho ayaa noloshoodaoo dhan intaas in ay  dhuuqaan ku bedesha, ilbaxnimo u arka, kaddibna habeenkii marka ay shiishadda dhuuqdo ayuu marna kan la joogo ee insiga ah ka zineysanayaa, kaddibna shayaadiinta ka dhiganayaa gole ay ku ciyaaraan oo ku kaadiyaan. Ilaah baan ka magan galnay anaga iyo intii Muslim ah jinni iyo insiba in aan ka mid noqono dadkaas sidaas u liita.*

*Su'aal: Dadka qaar waxay ku doodayaan balwadda la iskama dhaafi karo oo way ku qabaneysaa, arrintaas ka warran?*

*Reymaa: Balwadda waxa kuu qurxinaayo waa sheydaan, waxa dareenka aad ka heleyso ku siinayana waa jinni mujrim ah, marka aad balwadda isticmaaleysidna way ku kufsadaan, wasaqnimo tii ugu danbeysay ayey kugu sameeyaan, marka haddii uu qofka sidaas ku qanacsan yahay oo uusan iska deyn Karin adduunyo qurun, aakhiro cadaab, noloshana Sharaf*

*darro ayuu qofkaas ku waarayaa.*

*Su'aal: Dadka balwadda leh marka ay shayaadiinta kufsanayaan adiga ma arki kartaa?*

*Reymaa: Subxaana Malikul Qudduus! Ma arki kartaa maxaa waaye, waligey aniga oo aan lalabo u matagin waxaan matagay habeen aan fiirsanayay in gabar Soomaaliyeed oo inta shiishad ka dheregtay kaddibna ay 18 sheydaan iyo 4 jinni ay hal mar wada isticmaalayaan, mid isticmaalaya, mid ku dul saxaroonaya, mid ku dul kaadinaya, mid cantuuf ku tufaya, mid .... Wax aan la sheegi Karin ku sameynaya, iyadiina wey isak hamaansaneysaa, afkeeda wasaqda ka buuxda ee korkeeda ka wada urgumeysaa uma jeedo, miskiinta, anigii lalabbo ayaan is heyn waayey, umana tagi karin oo shayaadiinta iskuma faro gashanno anaga.*

*Su'aal: Ragga insiga ah ee ay jinniga kufsadaan ma rag jinni ah mise gabdho jinni ah, kuwee kufsada?*

*Reymaa: Markii ay arrin jinsi tahay gabdhaha jinniga ah ee mujrimiinta ah ayaa kufsadaan, balse marka ay gabdhaha jinniga ah ku ciyaarayaan, waxaa jira rag jinni ah oo ku sameynaya Sharaf dil iyo wasaqeyn, cantuuf iyo xaako jinni ayey madaxa, wejiga, afka iyo meel walba u saarayaan. Qofka belwedda leh haddii noloshiisa dhanka qarsoon banaanka la soo dhigi lahaa mar uun wax insi ah oo u dhowaada lama arki laheyn, aakhirana nolol taas ka liidata oo xun ayaa sugeysa.*

*Su'aal: Aniga ayaaba yalaalugooday e, bal tan halkan igaaga sin, waxaa jirtay arrin ku saabsaneyn saaxiibtaa Nujuum oo aad iiga sheekeysay, balse qabyo inoo aheyd, horta Nujuum "Koomihii" miyey ka soo baxday, ka warran xaalkeeda?*

*Reymaa: Nujuum weli way xanuunsaneysaa, laakiin "Koomihii" way ka soo baxday, balse inta toos u caafimaaday meysan billaabin shaqooyinkeedii.*

*Su'aal: Shaqadeedii maxay aheyd?*

*Reymaa: Nujuum waxay aheyd xogheynta guud ee gobalka Suufaadiin, waa*

*gabar madax ah, waa gabar dhanka jinniga Sharaf badan ku leh, waa gabar wax badan u qabatay ummaddeeda, balse haatan waxay taallaa isbitaalka Meermeer ee mowjadaha Badweynta Hindiya ku yaalla, meel kulaasha Suufaadiin oo 200kms dhanka biyaha badweynta ah.*

*Su'aal: Geeridii Axmed markii ay dhacday waxaad ii sheegtay in ay xasuus qorkeeda ku qortay qormo kooban, inta aysan koomaha galin, qormadaasna waxaa ka mid ahaa geeraar yaab leh, bal haddii aad arrintaas inoo dhameystiri kartid waan bogaadin laheyn aniga iyo aqristayaasheyda aadka kuula socda?*

*Reymaa: Nujuum aad ayey uga naxday geerida Axmed, waayo waxay laheyd rajo iyo himilo fog, dhammaan gabdhaheena asxaabta ah ee jinniga Muslimiinta ah waxaan ka dhursugeynay in iyada iyo Axmed arrintooda ay hagaagto, waayo haddii uu Axmed aqbalo oo ay is guursadaan waxaa ay inoo noqon laheyd fursad, iyada ayaana safiir inoo noqon laheyd oo u soo mari laheyn wiilasha insiga ah guurkooda. Balse xanuun iyo haddimo ayey ku dhacday oo wiilkii ay nolosha isla billaabeen ee meel fiican wax u maraayeen waa laga dilay.*

*Buugeeda xusuus qorka waxay ku qortay qoraal kooban oo dhaar ah oo ay leedahay sidan:*

*"Xabiibkeyga rumaadow geeridu waa xaq, haddii aad dhimatay Ilaahey haku geeyo meel wanaagsan oo aad nu nasato, waxaan kaa ballan qaadayaa in aan kuu aari doono, iyo in aan waalidkaaga, walaalahaaga, asxaabtaadii gaarka aheyd iyo gabadhii aad jecleydba aan ka ilaalin doono in uu jinni ku xadgudbo, qalbigeyga sidii baad weli ugu weyn tahay, xusuustaada uun baan dunida ku waari doonaa, nolosha farxaddeeda waa inoo aakhiro iyo janadii udgooneyd. ALLAAH waxaan ka baryayaa inuu ahlul janno kaa dhigo, aniguna igu daro gabdhaha Xuurun Ceynta ah ee uu kuugu talo galay…aaamiin"*

*Intaas yar ee qoraalka markii ay Buugeeda xusuus qorka ku qortay kaddib*

Abdulkadir Dulow

*waxaa ay raacisay geeraarka ay ku sheegeyso xanuunka sida uu u taabtay iyo waxa ay damacsan tahay in ay sameyso.*

*Geeraarkii inta aan ka xasuusto waa sidan:*

*Dhulkaa wada madoobaaday,*

*Dhirtaa wada ilmeynaysa,*

*Dheehii cirkaa guuray,*

*Dhogortii dadkaa suushay,*

*Dhamaan waa la wada ooyey,*

*Warku dhiillo weeyaane,*

*Dhamow Axmedow heedhe,*

*Dhimashadu xaq weeyaane*

*Dhabbihii janneed qaadday,*

*Dhererkiis hakuu gaabto,*

*Alla dhur xumaanteyda,*

*Dhibic yari nasiibkeyga,*

*Dhallanteedka nolosheyda,*

*Maxaa dhiilo ii yeershay,*

*oo dhaawac ii loogay,*

*Dhoolahayga murugeysan,*

Abdulkadir Uukow

*Qosolkayga Dhiileysan,*

*Xasuustayda dhumucdeeda,*

*Qalbigaygan kuu dhaartay,*

*Adiguu dhab kuu raacay,*

*Kuwa daadshay dhiigaaga,*

*Dhagartaada kuwa qaatay,*

*Anna dhidibka ii siibay,*

*Koley ay dhawr guyaad gaadho,*

*in aan dhaafin baa dhaar ah.*

*Su'aal: Dad badan waxaa ay is weydiin karaan Jinniga ma leeyahay Argagaxiso, ururro sida Alshabaab oo kale ma leeyahay, ururka Alshabaabse xubno jinni ah oo la shaqeysta ma leeyihiin?*

*Reymaa: Afuuuuufa! Su'aashan haddii aan jawaabteeda galo waan gubanayaa, waa in aan horta badda isku soo qaboojiyaa, ii sug.....*

***............... Fadlan ...Jawaabta... kala soco qeybta 8aad wareysigan***

## *WAREYSIGII: GABADHII JINNIGA AHEYD EE REYMAA, QEYBTII 8-AAD*

*Qalinka* ***Abukar Albadri***

*Dib U Habeyntii*

***Abdulkadir Uukow***

*– Wareysiga qeybtiisa toddobaad waxaa ay inoo mareysay aniga oo Reymaa weydiinay su'aal la xiriirtay in jinniga leeyihiin argagaxiso iyo in kale, wareysiga qeybtiisa 8aad waxaan ku billaabeynaa isla su'aashii ugu danbeysay iyo jawaabteeda, waana sidan.*

*Su'aal: Dad badan waxaa ay is weydiin karaan Jinniga ma leeyahay Argagaxiso, ururro sida Alshabaab oo kale ma leeyahay, ururka Alshabaabse xubno jinni ah oo la shaqeysta ma leeyihiin?*

*Reymaa: Afuuuuufa! Su'aashan haddii aan jawaabteeda galo waan gubanayaa, waa in aan horta badda isku soo qaboojiyaa, ii sug… een iga raalli noqo inta aan kaa maqnaa, dhabtii jinniga ma leh argagaxiso hubeysan, balse wuxuu leeyahay argagaxiso la dhaho wadaaddo iyo tafaafullow, kuwaas oo ku shaqeysta sixir, kab gemid, isku dir, isnecbeysiinta dad ama jinniga is jecel, iyo burburinta bulshooyinka, waayo fidno ayey ku dhex abuuraan. Balse jinniga hubeysan wuu ka jiraa dunida kale, Soomaaliya jinni hubeysan oo aan Jundaluulka aheyn ma jiro, waa la leynayaa wixii hub lagu arko.*

*Su'aal: Ma jiraa jinni idinka mid ah oo Alshabaab la shaqeysta?*

*Reymaa: Reer Si'lat kuma jiro qof Alshabaab la shaqeyata, balse shayaadiinta kale iyo jinniga nooca Jaanka la dhaho way la shaqeystaan, dadka ayey isla dhibaateeyaan.*

Abdulkadir Uukow

*Su'aal: Waxaad ii sheegtay in ay jinniga ku jiraan maalqabeenno caan ah, haddana jinniga maalqabeenadiisa halkee ayey ku nool yihiin, magaaladey ugu badan yihiin?*

*Reymaa: Soomaaliya meelo badan ayey kaga nool yihiin, ninka jinniga ugu maalqabeensan wuxuu ku nool yahay magaalada Ra'suMalik ee waqooyiga ku taalla, ninka ugu maalqabeensan ee aan hantidiisa la tirin karinna waxaa la dhahaa Reylaag al-Si'lat, wuxuuna ku nool yahay Ra'sulMalik, kan ku soo xigana waxaa la dhahaa Qaadi Owsaan, wuxuu ku nool yahay Buurta Buur Hakaba dusheeda, waa nin boqortooyo camal ah oo aad looga heebeysto.*

*Su'aal: Ra'sulMalik waa halkee?*

*Reymaa: Raalli noqo, idinka waxaad u taqaanaan Berbera, waa magaalo aad u weyn, oo dhankanna badda cas dhacda, dhanka kalena illaa Meesha aad Hargeysa u taqaanaan ku soo dhow.*

*Su'aal: Magaalada Berbera jinniga maalqabeen maxay ugu badan yihiin, maxay xarun uga dhigteen Berbera, maxay uga dhigan tahay? Ma xarun ganacsi, ma xarunta ciidamada mise halka ay deggan yihiin dadka ugu magac dheer?*

*Reymaa: Berbera waa halka ay ku nool yihiin Maalqabeenada Jinniga Soomaaliyeed, waana magaalada labaad ee Soomaaliyada jinniga ugu weyn, Suufaadiin uun baa ka weyn, hase yeesheen Suufaadiin waxaa ka ku nool shacabka ugu badan, iyo maamulka dalka, Berberana waxaa ku nool*

Abdulkadir Uukow

*Maalqabeenada jinniga Soomaaliyeed.*

*Su'aal: Reylaag iyo maalqabeenada jinniga ah maxay ka sameeyaan hantida aad sheegtay?*

*Reymaa: Reylaag wuxuu ka ganacsadaa lafaha dadka dhintay, wixii Hindiya u iibgeeyaa lafaha dadka, halkaas oo lafahaas ay ka faa'iideystaan Hindida aan Muslimiinta aheyn, marka wixii lafo dhinta isagaa ka ganacsada, waana nin 1200 oo sano jira, hantidiisa waxay la eg tahay 100-ka ugu maalqabeensan shanfaroodlaha adduunka oo la isku daray waxa ay heystaan ka badan.*

*Su'aal: Jinniga ma leeyihiin fanaaniin caan ah?*

*Reymaa: Haa, waligaa ma dhegeysatay Ru'fiyaat bintu Sawtah oo heeseysa, xaadda dhan ayaa ku istaagi laheyd, heesteeda YAA RUUX ayaana ugu caasan heesaheeda, markii ay YAA RUUUUUUUUUX, ay dhahdo noolaha dhan ayaa istaaga.*

*Su'aal: Jimniga ma leeyahay heeso waddani ah?*

*Reymaa: Haah, waaba heesaha aan ku jebinay jinniga amxaaro iyo kan Kenyaanka, Soomaalidii shan faroodlaha aheyd Amraaxadii baa iska qabqabsata, xitaa ninkii maalmahan la sheegaayey muxuu ahaa, Qalbi Adag miyuu ahaa, haah, waa Qalbi adag, ninkaasba waa lagu horqatay shan faroodlaha Madaxda ah, lowlaa ay jinni ahaan lahaayeen kuwa Villa*



Abdulkadir Uukow

*Soomaaliya jooga Amxaaro wax baa qabsan lahaa.*

*Su'aal: Maxaad ku caddeyneysaa in jinniga ay iska celiyeen Itoobiyaan iyo Kenyaati?*

*Reymaa: Car waakaase ii sheeg qof jinni ah oo inta la qabtay loo dhoofinaayo Itoobiya, weligaa ma maqli doontid. Kolleyba anaga hubkeena iyo dhaqaalaheena qaaradda Fafilina ee aad u taqaanaan Afrika ma joogaan, jinniga Soomaaliyeed ayaa ugu hub iyo dhaqaale badan.*

*Su'aal: Afrikada jinniga waa imisa dal?*

*Reymaa: Waa 23 dal kaliya, waana dalal aan la gumeysan marka laga reebo koonfurta Afrika, Masar iyo Haamuusa ama Meesha aad u taqaanaan Nigeria, Ghana, Liberia iyo Angola oo hal dal isku ah xageena.*

*Su'aal: Jinniga Soomaaliyeed dal ahaan ma loo soo gumeystay, yaa gumeystay, sidey isu xureeyeen?*

*Reymaa: Maya, nalama gumeysan, jinniyada yurub waxaa ay gumeysteen Waqooyinga Faafilina, Galbeedka iyo koofurta Faafilina, laakiin bartamaha, bariga iyo Geeska Faafilina lama gumeysan. Gaar ahaan Soomaaliya lama gumeysan, jinniga Yurub markii oo Magaca Soomaaliya maqlo wuu sii qaxaa, wuu naga cabsadaa.*

Abdulkadir Uukow

*Su'aal: Soomaaliyada jinniga ah haddii aan la gumeysan Jaziirada Soqotra ma Soomaali baa leh mise Yemen?*

*Reymaa: Yemen intee la dhahaa, Meesha aad Yemen u taqaanaan inteeda badan waxaa ay ka tirsan tahay gobalka Raasamiinudiin ee aad u taqaanaan Gobalka Bari, Soqotra waaba halka ay ku yaallaan inta badan iskuulada Raasamiinudiin.*

*Dalkan wuxuu ka dayacan yahay dhanka insiga ee dhanka jinniga wuu kia difaacan yahay, haddii ay jiri laheyd hab ay ku xiriiraan jinniga iyo insiga si toos ah waxaan maamulka shan faroodlaha ka caawin laheyn sidii ay u degsan lahaayeen qorshe ay isaga difaacaan cadowgooda, hab ay dalka ku difaacdaan iyo si ay ku noqdaan awood ballaaran.*

*Su'aal: Soomaaliyada insiga ah waxaa ka dhacay afgenbi ciidan, kaas oo 21 sano dalka heystay, dhanka jinniga afgenbiyo maka dhacaan?*

*Reymaa: Maya, markii ugu danbeysay ee Soomaaliyda jinniga ah uu afgenbi ka dhaco waxaa ay aheyd 2000 sano ka hor, hadda waxaas ma jiraan, dhammaan Mandaluulka iyo Jundaluulka ayaa laga cabsanayaa, cid wax afgenbin karta ma leh.*

*Su'aal: Waxaad ii sheegtay in jinniga maalqabeenada ah ay lafaha dadka ka ganacsadaan, halkey ka keenaan, sideyse uga ganacsadaan?*

*Reymaa: Shan faroodle lafihiisa jidadka ayey buuxaan, meel walba ayey ku*

Abdulkadir Uukow

*dayacan yihiin, qabuuraha ayaa laga soo fagaa, meelaha tahriibka ayaa laga soo daldalaa, dagaal marka uu dhaco waa laga soo aruuriyaa, shan faroodle lafihiisa yaaweynaayo.*

*Su'aal: Kuwa iibsanaayo maxay ku sameynayaan?*

*Reymaa: Waxay u isticmaalayaan habab badan oo aanan kuu sheegeyn, aniga hawshaas mar danbe ha I weydiin, waaba kaa shakiyey, ma waxaad dooneysaa in aad Reylaag ka joojisid ganacsigiisa, Hiiiiiiiiiih.... Khuuuuuuuuukh, xeeeeeeeeeeeeeeeex.*

*Su'aal: Raalli noqo, is deji.... Een ... een haddii aan u soo noqono dhanka jinniga iyo dadka, waxaad mar ii sheegtay in jinniga uu inta badan dadka ku dharbaaxo irridda suulliga ama musqusha, muxuu meeshaas dadka ugu dharbaaxaa?*

*Reymaa: Jinniga wuxuu faddiistaa irdaha qolalka iyo suulliga, halkaas ayuu isaga raaxeystaa, dadkana iyaga oo aan adkaar aqrin oo jinnigii laga qarin ayey si indho la'aan ah suulliga u soo galaayaan, kaddibna jinni iyo carruurtiisa suulliga irriddeeda ku leersanaayey ayey ku istaagayaan, markaas ayaa dharbaaxadooda labaraa.*

*Su'aal: Dadka maad u dhaaftaan musqulahooda iyo irdahooda haddii aad diideysaan in la idinkuistaago?*

*Reymaa: Musqulaha waa meelaha augu badan oo ay jinku deggan yihiin,*

*waa in adkaar la'aan aan la galin aslanba, ciddii gasha ee dhafoorkeeda uu dharbaaxo jinni ku qaaciyo iyada uun xaanshiyaha hala sheekeysato, qofkii aan rabin in maskaxdiisa jeebka loo galiyo waa inuu adkaarta afka ku hayaa.*

*Su'aal: Jinniga marka uu qofka doonayo in uu dhibo wuxuu galiyaa riyooyin xun xun, maxay yihiin riyooyinka xun xun ee uu jinniga dadka ku cabsi galiyo, sideese looga badbaadi karaa?*

*Reymaa: Riyooyinka xun xun ee cabsida ah waa hawl uu shaydaanka galiyo dadka gaar ahaan kuwa aan cibaadadooda badneyn amaba aysan u saxneyn. Gaar ahaan kuwa salaadaha inta dayacaan kaddib hal mar qallo ahaan u jumleeya, ama salaadda si iska foorfooraasi ah u dukada ama aan wax adkaar ah aqrisan, dadka noocaas ah marka hore jinni ayaa habeenkii hurdada ku cabsi galiya, kaddibna sheydaanka ayaa riyada ku kufsada ugu danbeyn haddii aysan is daba qaban way waashaan.*

*Su'aal: Jinniga ma leeyahay hab ama nidaam garsoor iyo maxkamado?*

*Reymaa: Haa, jinniga muslimiinta ah wuxuu leeyahay maxkamaddo madani ah, kuwo heer dhexe ah iyo kuwa shareecada. Maxkamadda ugu sarreysa waa shareecada, markii arrimaha ay yihiin kuwo aan madani iyo xaal mastuur lagu xallin Karin shareecada ayaa la isla aadaa. Balse jinniga aan muslimiinta ah aheyn wax nidaam garsor ma leh, sida ay u kala xoog badanm yihiin ayey isu dhibaateeyaan, sixir iyo dhibaatooyin kale uun bey isku dhibaateeyaan, waana kuwaas kuwa dadka dhibaateeya.*

*Su'aal: Caawo waxaan rabaa in aan su'aal kaa weydiiyo mowduuc aad muhiim u ah oo aad ii sheegtay kaas oo ahaa in markii uu jinniga waalo*

Abdulkadir Ulkow

*gabdhaha qalbigooda uu geeyo meel aad ku sheegtay Qalcad-Furaadaad, halkaas oo sidoo kale ah, marka qalbiyada gabdhaha meeshaas la geeyo jinniga muxuu ku sameeyaa, ma laga soo celin karaa, side looga soo celin karaa?*

*Reymaa: Qalcad-Furaadaad...hiiiiiiiiiiiiiiiiiiiih … waa moqduuc xiise badan leh … ee ..…. **Fadlan …Jawaabta… kala soco qeybta 9aad ee wareysigan.***

## *WAREYSIGII: GABADHII JINNIGA AHEYD EE REYMAA, QEYBTII 9-AAD*

*Qalinka **Abukar Albadri** Dib U Habeyntii **Abdulkadir Uukow***

*– Wareysiga qeybtiisa siddeedaad waxaa ay inoo mareysay aniga oo Reymaa weydiiyay su'aal la xiriirtay halka uu jinniga geeyo qalbiga gabdhaha marka uu ka xado oo uu waalo, wareysiga qeybtiisa 9aad waxaan ku billaabeynaa isla su'aashii ugu danbeysay iyo jawaabteeda, waana sidan.*

*Su'aal: Reymaa! waxaan rabaa in aan su'aal kaa weydiiyo mowduuc aad muhiim u ah oo aad horey iigaga sheekeysay kaas oo ahaa in marka uu jinniga ku darsoomo gabadhaha oo uu waalo in uu qalbigooda qaado oo uu geeyo meel aad ku sheegtay Qalcada-Furaadaad, halkaas oo sidoo kale ah, Meesha ugu qiimaha badan dunida jinka, marka qalbiyada gabdhaha ay jinka halkaas geeyaan maxayku sameeyaan?*

*Reymaa: Qalcadda Furaadaad waa meel leh beero quruxda, udgoonka iyo il*

qabowsiga ka jira darteed aysan ishu milicsi mooyee aanay ka libdhi kareyn.

Halkaas waxaa ku yaalla qalcado, tan ugu caansan oo qalcadahaas ee Meesha oo dhanna loogu magac daray waa qalcadda Furaadaad, dunidan meel ka qurxoon oo lagu misaalo kuma taallo. Meesha gebigeedba waa meel jaceyl oo waxaa yimaada jinniga uu jaceylka haayo, waxaana sidoo kale la keenaa qalbiyada la jeclaaday ee insiga laga soo xaday.

Su'aal: Jinniga markii uu qalbiga gabar insi ah soo qaado, gabadha qalbigeeda la qaaday maxaa ku dhacaya?

Reymaa: Way siimaasisaa, ama way qalbiyo badisaa, kaddibna qalbigeeda wuxuu noqdaa qol hawada u furan oo leyrta iyo dabeyshuba ay ku dhacaan.

Mararka qaarna neecawda iyo hanfiguba way marti galisaa, waayo qalbigii halkii laga saaray baa duleesha.

Waxaa intaas dheer in jinniga marka uu qalbiga gabadha ka soo qaado wuxuu ula dhaqmaa labo siyaabood middood uun. Waa midda koowaade in uu gabdha qalbigeeda uu geysto halka loo yaqaano Sidri-Soorka ee ku taalla meerayaasha Orbit dushooda, amaba sii fogeeyo oo geeyo daanta shishe ee meeraha ubax-soorka, halkaas oo uu ka soo shaac baxo ileyska iftiimita qalbiyada wax jaceyl, nuurkana u bidhaamiya caashaqa, amaba wuxuu geeyaa marin haweedka uu soo fiixo ugbaadka dareen-simo ee ka baxa togga qalbiyadu kulaalaan ee dunidan ugu udgoonka badan.

Gabadha uu jinniga qalbigeeda meeshaas geeyo dabeecadaha lagu garto waxaa ka mid ah, waxaa ay ku noolaataa riyooyin qurxoon oo aad u khiyaali

Abdulkadir Uukow

*wanaagsan, udgoon oo aan laga daaleyn, nuuraya oo mar walba la daawan karo. Inta badan way iska faraxsan tahay, mana oga waxa ka farxiyey, way dhoollacadeyneysaa, mana oga waxa ka qosolsiiyey, kaligeed ayey qososhaa, muraayadda ayey isku daawataa, way isu bogtaa, way iska heshaas, hadba way is eegtaa, way iska sii heshaa, way is jeclaataa, way isasii cajabisaa, kaddibna jirkeeda meelaha ugu qurxoon, uguna ilqabadka wanaagsan ayey gacmaha la raacdaa, ama isha ka buuxsataa, iyada oo is leh waxaa ay ku habboonaan laheyd in saacaanba mid duceysan uu sidii waslad hilib ah oo bisil uu uga laaco. Dhammaan waxaas waxaa ka keenaya jinnigii oo qalbigeeda inta soo dhex galay, lugaha dhex fidsaday, kaddibna halkaas jirkeedii ka jeedaalinaaya, uguna raaxeysanaaya si dadban. Sida doorbiinka meelaha dhaadheer aragtida uga soo dhoweeyo ayuu jinnigana gabadha qalbigeeda u dhex gashtaa raaxada uu markaas tabaayo. Indhaheeda ayuu u isticmaalayaa in uu iyadii ku daawado, gacmaheedii ayuu u isticmaalayaa inuu jirkeedii ku salaaxo, qalbigeedii ayuu u isticmaalayaa inuu rabitaankiisa dhex marsiiyo, iyaduna waxaa ay moodeysaa in ay iyada is daawaneyso, iska heleyso, is cajabineyso.*

*Su'aal: Gabadha qalbigeeda marka uu qaado ma meel buu dhigayaa mise wuxuu ku qadwadayaa gacmihiisa?*

*Reymaa: Gabadha qalbigeeda jinniga wuxuu dhigaa laba meel middood. Haddii gabadha uu aad u jecel yahay oo uusan dooneyn in ay WaaaaaaaaaaaaaaaaW inta dhahdo waalato wuxuu qalbigeeda dhex dhigayaan sanduuq la yiraahdo Riixaana, waxaana gudihiisa ku diyaarsan turaaxado xariir ah, ubaxyo, dhir, udgoon iyo curriyeyaasha neecawda dhaliya ee ka farcama dhammaanba geed miroodyada xalaasha ah. Waxaa jirta maahmaah ay wiilasha jinniga ah u adeegsadaan gabdhaha insiga, marka ay arkaan iyaga oo kaligood iska qoslaaya, waxayna dhahaan "Qosol badnaa ma qalbigiibaa Riixaana kaga qufulan?"*

*Midda kale, marka uu jinniga cadaawad u qaado gabr uu jeclaaday, kaddibna uu ku talo galo in uu waalo oo nolosha seejiyo wuxuu qalbigeeda ku ritaa kamuudinkiisa, ama koleygiisa sida hadba aad u fahmi karto, kaddibna wuu wilfiyaa, kaddibna gabadha way waalaneysaa, way orordeysaa oo dadka ayey tuuryeyneysaa, qashinka ayey jidadka ka uruurineysaa, nijaasada iskama nadiifineyso, oo nolosheeda waa baabah, jinniga noocaas ah waa midka xaasidka ah ee aan dooneyn gabadha uu qalbigeeda hanan waayey in ay badbaaddo.*

*Su'aal: Ma jirtaa si ay gabadha kaga badbaadi karto xitaa haddii uu jinnigaas xaasidka ah doonayo inuu qalbigeeda qaado oo jidadka wilfiyo, ama xitaa jinniga kale ee qalbiga gabdhaha geeya Qalcadaha Furaadaad?*

*Reymaa: Haa, hal shey uun baa lagaga hor tagi karaa, taasina waa Adkaar, Quraan iyo in ALLAAH la magan galo, meeshaas ah maganta Ilaahey uun baa lagaga ammaan heli karaa jinni ku soo maagay.*

*Su'aal: Jinniga ma qalbiyada gabdhaha uun buu geeyaa Furaadaad mise way jiraan gabdho jinni ah oo qalbiyada wiilasha insiga ah iyagana inta qaadaan meeshaas geeya?*

*Reymaa: Way jiraan gabdho jinni ah oo wiilal insi ah qalbigooda inta qaadaan meeshaas geeya, laakiin waxaa jirta in jinniga gabdhaha ah ay ka nugul yihiin jinniga wiilasha ah, sidaas darteedna wiilasha insiga ah way ka adag yihiin gabdhaha insiga ah, taas ayaa keenaysa in tirade wiilasha jinniga ah ee qalbigooda Furaadaad la geeyo, way jiraan qaar qalbiyadooda ay gabdho jinni ah furaadaad ku heystaan, balse uma badna sida gabdhaha insiga ah.*

*Su'aal: Qalcadahan aad sheegtay in qalbiyada gabdhaha iyo wiilasha insiga ah ay jinniga geystaan ee ku heystaan horta yaa deggan, ma meelo hab ganacsi loo tago oo lacag lagu galo baa, mise waa meelo bilaa lacag ah oo qofka uu iska tagi karo?*

*Reymaa: Meesha waa beero janno adduun ah oo ay jinniga maalqabeenno ah u sameysteen in ay lacag kaga qaataan mucaashaqiinta jinniga ah. Waxaa meeshan isla tag mucaashaqiinta jinniga ah oo waxay leedahay xeebo qurux badan oo weligaa aadan ka il bogan karin, webiyo gacan ku sameys ah oo araggaaga la tagaya oo maskaxdaada aysan marna rumeysan Karin quruxdooda, iyo geed miroodyo badan, ubaxyo u sameysan dhammaan noocyada nooluhu ku ildoogsado, waa meel maskaxda ku degeyso, ruuxda ku daal baxeyso, jirku ku naaxayo, nafta oo dhamina ay isu dhiibeyso oo aanay ka maarmi kareyn.*

*Meesha waxaa ay leedahay qalcado ka kala duwan oo kala qiime ah, hadda aniga qalcad baan ka kireystay sanduuq ka mid ah kuwa Riixaana oo heerkiisu yahay Lu'Lu maknuun, kaas oo aan ugu talo galay in aan mar uun geeyo qalbiga ninka aan dunidan ka jeclaaday ee aan dartiis u deganahay degmada Cabdul Casiis, balse ninkaas adkaartiisa tirade badan darteed ayaan awoodi waayey in aan mar uun qalbigiisa halkaas geeyo. Maadaama ay taas ii suurto galiwaysay waxaan meeshaas geeyey sefeleetiga dhididka lagu tirto oo uu isaga lahaan jiray, kaas oo aan astaan ahaan Meesha u dhigtay, dhididkiisana ka dugsado.*

*Mararka aan nasiinada meeshaas u tago, halka aan ka deganahay Furaadaad ee ah daanta waqooyi ee webiga Maa'u Dahab, waxaan halkii xilli oo ah 15 maalmood ku bixiyaa lacag u dhiganta 20 milyan oo dollarka*

Abdulkadir Ujukow

*Mareykanka ah, taas oo ah lacagta Riinaad-ka ee uu jinniga isticmaalo.*

*Haddii aan hal habeen oo nolosheyda ka mid ah aan meeshaas kula caweyn lahaa mataankeyga Indho-dahab waxaan isku waajibin lahaa in aan nolosheyda inta ka dhiman aan samafal uun ka shaqeyn lahaa.*

*Waxaa jiraan gabdho yar yar oo aan adkaartooda badneyn oo qalbiyadooda ay wiilal jinni ah meeshaas keeneen kuna baxnaaniyaan, balse kuwaas way iska gaari karaan oo marka ay qaangaarayaanba adkaarta ayey badsanayaan, kaddibna qalbigii kaga qufulnaa sanaadiiqda jaceylka jinniga ee Reyxaana wuu u soo furmayaa.*

*Su'aal: Waxa ugu dhib badan ee gabadha qalbigeeda Furaadaad la geeyey nolosheeda ku dhici kara maxaa ka mid ah?*

*Reymaa: Waxaa ka mid ah in aysan ku guuleysan nolol jaceyl iyo farxad ku dhisan, waayo maadaama uu qalbigeeda wiil jinni ah heysto wuxuu ka ilaalinayaa in ay galiso wiilka insiga ah ee ay nolosha la wadaageyso, mar walba wuu u ursiinayaa, wuu ku dirayaa, wuu u suuro xumeynayaa, qalbiga ayuu qalqal kaga furayaa, wiilka ayuu shaki galinayaa, kaddibna wuu kala geynayaa.*

*Waxaad arkeysaa gabar qurux badan, shidan oo kala xiran oo haddana ninkii guursadaaba uu soo furayo, isma ogee qalbigeeda ayaa Furaadaad lagu hayaa, hoogto is gaar oo quraanka isku boobsii, oo adkaarta daa'im ayaan dhihi lahaa.*

Abdulkadir Uukow

*Ogow gabar qalbigeeda uu jinni ku ciyaarayo ma liibaaneyso, quruxdeedana waxba ma tareyso, waayo si kasta oo ay u qurxoon tahay, isula qab weyn tahay, karti isula leedahay haddii aysan jinniga ka badbaadin isaga ayaa bah dilaya oo ka dhigaya mid nolosha ku fashilantay, wuxuu qalbigeeda ka buuxinayaa shaki iyo kalsooni darro, wal wal iyo han yari, kaddibna gabadhii sida baallayaasha Sollar-ka u shidneyd oo aan wax nuur ah laheyn ayaa la arkayaa.*

*Su'aal: Waxaa jira gabdho marka ay wiilasha saaxiibka la yihiin aad jaceylka ula wada, xiiseeya, jeclaada, nolosha kula heshiiya, reerkooda u dira oo dhahaya iga doono waalidkii, kaddibna uu wiilkii doonanayo, aroos loo dhigayo, marka ay noloshii askumaan kaddib reerkii iska duminaya oo fowdo iyo buuq joogto ah, qanacsanaan la'aan, guryan iyo balaayo ay la soo dersaan, kuwaas ma jinniga ayaa u sabab ah?*

*Reymaa: Soomaalidu waxay dhahdaa Jaceylka Calafka ayaa ka weyn, jinniguna wuxuu dhahaa calafka jinniga ayaa ka xoog badan. Jinniga mar haddii uu gabar qalbigeeda uu gacanta ku dhigo gabadhaas nolol farxad leh arki meyso illaa ay qalbigeedii dib u soo xureysato, waayo iyadii oo gurigoodii dhex kadankooda ayuu qalbigeediina jiraa Furaadaad oo ku taalla meerayaasha kuwa ugu sarreeya, marka halkaas qofkii qalbiga ku heyn kara wixii uu doono ayuu kaa sameysanayaa, taas ayaa keeneysa in aan gabdhaha uga digo in ay noloshooda ka taxadaraan oo ay adkaarta gabbaad ka dhigtaan.*

*Su'aal: Arrintii aad ii sheegtay ee aheyd in ay jirto meel la yiraahdo Xuzni oo ah meel ay isugu tagaan jinniga u xanuunsada jaceylka ay insiga u qaadeen darteed, kaddibna meeshaas murugadii jaceylka ku qaata, bal arrintaas inoo faahfaahi?*

*Reymaa: Waa sax, badweynta Xuzni waa meel buuro baraf ah oo badweynta dhexdeeda ah, waa meel aaney cidna laheyn, waxa kaliya ee aad arki kartaa waa seddax shey, kow waa buuraha barafka ah, labo waa ubaxyo ay meeshaas keeneen mucaashaqiinta jinniga ah ee murugeysan, seddaxna waa mucaashaqiinta jinniga ah ee la xanuunsanahay haddimada ah ya qaadeen jaceylka ka fashilmay ee ay u qaadeen insiga Soomaaliyeed.*

*Su'aal: Xuzni ma joogaan wax insi ah, mase la geeyaa qalbi laga qaaday qof insi ah gabar iyo wiil waxa uu doono ha ahaadee?*

*Reymaa: Xuzni waa Meesha uu aado, kuna sugnaado jinniga jaceyl insi dartiis u waasha ama u xanuunsada, waana meel aan wax raaxo ah oollin marka laga reebo buuraha barafka ah oo qaboojinaya jinniga maadaama uu jirka jinniga uu aad u gubanayo marka uu tiiraanyeysan yahay, jinnigana waxaa uu meeshaas u tagaa waa meel uu ku noolaado inta nolosha uga dhiman, waana meel uu ka helayo jinni kale oo ay isku daruuf yihiin, taas ayaan keeneysa in uu jinniga dhibban uu meeshaas aado si uu u helo wax ay isku daruuf yihiin.*

*Su'aal: Xuzni ma lagac ayaa lagu galaa?*

*Reymaa: Maya, waa bilaa lacag, waase meel dhib badan oo aan nafta u rooneyn.*

*Su'aal: Saaxiibtaa Nujuum waxaad ii sheegtay in ay xanuunsaneyd oo mar ay taallay isbitaalkii Meermeer ee hirarka dushooda sabbeynayey, haatan*

Abdulkadir Uukow

*halkey ku danbeysaa, ma Xuzni ayey tagtay mise?*

*Reymaa: Maya, Nujuum weli ma tagin Xuzni, ugu danbeyn way tagi doontaa oo nolol farxad leh uma harin, waayo gabdhaha jinniga hal mar kaliya ayey wax jeclaadaan, mar labaad wax ma jeclaan karaa oo awooddaas ma leh, insiga ayaa awooddaas la siiyey, haatan maadaama gacaliyaheeda Axmed laga dilay waxaa ay qorsheyneysaa in ay ka aarsato Alshabaab, gaar ahaan kuwii soo maleegay qarixii Axmed lagu dilay. Haddii ay qorshahaas ku guuleysato waxaa ay aadi doontaa Xuzni, in kastoo aan qorsheynay aniga iyo Ru'yatul Ceyn iyo Hooyadey in aan Nujuum badbaadino oo aan ku qancinno in aysan is dhiibin oo tagin Xuzni. Haddii ay naga yeesho waxaa ay nolosheeda ku qaadan doontaa Kismaayo, halkaas oo ay deris kula noqon doonto Ru'yatul ceyn.*

*Su'aal: Adiga waxaad muddo 30 sano ah jecleyd ninka aad naaneystiida ka dhigtay Indho-dahab, lacalla haddii uu dhinto maxaa kuu qorsheysan?*

*Reymaa: Khiiiiiiiiiiiiiiiiiiiiiiiiiiiiiiiiiiiiiiiiikhh…….Xuuuuuuuuuuuuuux…….qunqum…qunqum …Zulla..Zulla…. dhinto aad…. Sideed u dhihi kartaa kalmaddaas?*

*Su'aal: Reymaa raalli noqo, fadlan raalli noqo, aniga Indho-dahab kaa dili mayo, balse su'aan uun baan ku weydiiyey?*

*Reymaa: Haddii aad mar danbe geerida Indho-dahab igala hadasho dhulka hoostiisa ayaa lagaa soo faagi doonaa, car waakaas e mar danbe ku soo celi… Xuuuuuuuuuuux… Zulla … Zulla.*

Abdulkadir Uukow

*Su'aal: Hagaag! Ka hadli mayo, cimrigiisa ha raago waa nin Soomaaliyeed oo walaakey ah e, waxaad ii sheegtaa jinniga marka ay dhintaan ma is duugaan, ma janaso aye isu dukadaan, maxaa dhacaya tacsidooda?*

*Reymaa: Jinniga Muslimka ah wuu is duugaa, way isku dukadaan, wayna isu tacsiyeeyaan, balse kan gaalada ah nidaam, akhlaaq iyo aadaab la raaco ma leh, jidadka ayuu urkiisa dhooban yahay.*

*Waxaana ugu wacan in marka horeba jinniga gaalka ah uusan laheyn wax manhaj nololeed ah oo uu raaco, waxa kaliya ee uu joogteeyo waa dhibaateynta dadka, gaar ahaan Muslimiinta aan adkaarta badin.*

*Su'aal: Haddii aan su'aal muhiim ah ku weydiiyo insigu qalbiga kama qaadi karaa jinniga sida uu jinnigaba yeelo oo kale?*

*Reymaa: Maya, jinniga wuu arkaa insiga, balse insigu ma arko jinniga badanaa, marka sida uu jinniga insiga u gaado insi uma gaadi karo jinniga.*

*Waxaa jira marxalado la dhihi karo insiga gabdhaha jinniga ah wuxuu ka qaadan karaa qalbiga, taas oo ay ka mid tahay xaaladdeydan oo kale. Aniga hadda qalbigeyga wuxuu u go'ay Indho-dahab, wax walba oo la sheego marna qalbiga kama saari karo, sidaas darteed qalbigeyga isaga xagiisa ayuu jiraa, balse isaga igama qaadin ee jaceylka aan u qabo ayaa daruuftaas u baday.*

Abdulkadir Uukow

*Jinniga waxaa ay taas kaga duwan yihiin qalbigii buu kaa qaadanayaa adiga oo aan ka warheyn, waxaad arkeysaa uun adiga oo kaligaa dhiillacadeynaya, kaligaa isu iljebinaya, kaligaa is cajabinaya, kaligaa jirkaaga salaaxaya, kaligaa uun si isugu mashquulsan, haddana ogeyn waxa kugu riixaya in aad sidaas yeesho, marka insigu wuu ka fursad wanaagsan yahay jinniga waayo haddii aad adkaar aqriso waad soo ceshan kartaa qalbigaaga, balse jinniga wax uu aqrisan karo oo uu qofkaas uu jeclaaday ku soo jiidan karo ma leh haddiiba qofka uu yahay ahlu diin.*

*Su'aal: Haatan waxaan soo gaarnay gebagebadii wareysigan oo aad u sheeraa, bal maxaad u sheegeysaa dadka wareysigan aqrisan doona ee insiga ah iyo gabdhaha iyo wiilasha Soomaaliyeed ee jeclaan lahaa in ay jinniga la xididaan?*

*Reymaa: Horta intii denbi ah Ilaahey ha inaga dhaafo, wixii gefaf ah Ilaahey ha inaga cafiyo, dadka wareysiga la socon doona waxaa leeyahay waa idin dan in aad talooyinka wareysigan ku jira aad qaadataan, waayo haddii aadan qaadan waxaa lumineysaa qalbigaaga, caqligaaga iyo dareenkaaga, kaddibna qoloftaada oo aan macne badan laheyn ayaad meel la fadhineysaa, haddana nolol wanaagsan ayaad ku fikireysaa in aad hesho, ismana keeni karaan in caqligaaga uu Furaadaad jiro adigana aad nolol farxad leh rabtid.*

*Teeda kale, waxaa laga yaabaa in bulshada insiga ah ee Soomaaliyeed aysan ogeyn bulshada jinniga ah ee la nool. Jinniga waa walaalihiin, dalka ayey idinla leeyihiin, dhulka ayey idinkula nool yihiin, guryaha ayey qeyb ka joogaan gaar ahaan suulliga iyo meelaha qashinka la dhigo, sidaas darteed bulshadaas walaalihiin ah tixgeliya, dhawra, iskana ilaaliya oo kooda xaasidka ah iyo kooda gaalka ah yeysan noloshiina ku tumanin. Sida kaliya ee aad jinniga isaga ilaalin karto, isagana aadan dhib ugu geysaneyn waa in*

*aad adkaarta badisaan, waa in aad ALLAAH magan gashaan, waa in aad la socotaan waxa korkiina ka socda ee dareen, dhaqdhaqaaq iyo ficillo isugu jira.*

*Gaar ahaan gabdhaha, haddii aad aragto adiga oo inta muraayad hor istaagtay iska ilbuuxsaneysid ogow qalbigaaga jinnigii heystay ayaa isla indhahaaga u adeegsanaya in uu jirkaaga daawado, haddii aad aragto adiga oo isu iljebinayana sidoo kale, waxaa laguugu talo galay in wiilka ku guursada uu kaa ilbuuxsado, kuuna il jebiyo, ee mid aadan u jeedin yuusan kugu dayine adkaarta badso.*

*Tan ah wiilasha iyo gabdhaha Soomaaliyeed ee doonaya in ay la xididaan jinniga waxaan leeyahay waa arrin dhib badan, way dhici kartaa in la xidido balse waxaad mari doontaa dhib 100 jibbaar ka badan kan aan hadda marayo ee 30 sano ka badan aan ninka Indho-dahab ah jeclaa, welina uusan ii ogeyn oo adkaarta uun uu igaaga dhigtay deyd uu iiga dhuunto. Marka waqtigiina oo iska koobnaa yuusan idinka qaadin raadinta nolol aad jinni la wadaagtaan.*

*Su'aal: Ugu danbeyntii, waxaan halkan ku joojineynaa wareysiga, balse ma laga yaabaa in aniga iyo adiga xiriirkeena uu sii socdo si aan kuula yeesho wareysiyo kale marka loo baahdo, mase laha yaabaa in aan kuu noqdo wasiiladii aad kula xiriiri laheyd insiga, haddii xitaa loo baahdana aan kaaga ergeeyo ninka aad jeceshaya ee Indho-dahab ah?*

*Reymaa: Tan ah xiriirkeena wuu jiri karaa, balse aniga uun baan markii aan doono kula soo xiriiraya, sidii hore ayaan xiriir kuula soo sameyn doonaa, haddii shaki badan igama qabi doontid, balse tan ah in aad iiga ergeyso gacaliyaheyga Indho-Dahab waa in aan ka fiirsadaa go'aankaas, waayo ma*

Abdulkadir Ulukow

*hubo in uu I aqbali doono, haddii uu dareemo in ay gabar jinni ah jeceshaya wuxuu iga xiran karaa albaabada, wuxuu isu hor gudbi karaa Quraan iyo adkaar aanan dhaafi Karin.*

*Su'aal: Mahadsanid Reymaa, waxaan kaaga mahadcelinayaa waqtigaaga qaaliga ah iyo macluumaadkan dahabiga ah ee aad iga wadaagtay, iyo sida aad ii tixgalisay muddadii aan wareysiga wadnay.*

*Reymaa: Adiga ayaa mudan, shan faroodle kaa geesisan ma arkine hore ii mood… waana kaftan.*

*GUNAANAD*

*Asxaabteyda qaaliga ah, waxaa halkan inoogu dhamaaday wareysigii Reymaa oo ahaa mid xiiso gaar ah leh, kulansadayna macluumaad run ah iyo hal abuur farshaxanimo. Waxaan idinkaga mahadcelinayaa sida wanaagsan ee aan isula soconay. Sheekadu waxaa ay aheyd hal abuurkeyga, balse macluumaadka aan adeegsanayey 60% waxaa uu ahaa mid run ah. Sidaas darteed inta aan isugu imaaneyno sheeko kale oo tan ka xiise badan, waxaan idin leeyahay isma dhaafno.*

*Wareysigaan Waxaa Qaadey*

***Abukar Albadri***

*Waxaa Dib U Qorey Oo Habeeyey*

***Abdulkadir Uukow.***

***Fadlan ilaali Xuquuqda Buuga Mahadsanid***

Abdulkadir Uukow

# DHAMMAAD

Copyright telegram @akhriskaab



AKHRISKAAB FREE BOOKS